MAJALADDA MARAG

Cadadka Shanaad | Aug 2025

# WAXBARASHADA SARE IYO HOGGAAMINTA

## DIB-U-HABEYNTA JAAMACADAHA IYO SOO SAARIDDA HOGGAAMIYEYAASHA MUSTAQBALKA

Dr. Maxamuud C/Raxmaan Maxamuud

Bogga: 33



Xigashada Sawirka: UNSOM

# Qorayaasha Majaladda



Cabdullahi M. Cawsey
Dhiraandhirinta Fekerka Iyo Fursadaha Dhallinyarada! 4


Dr. Maxamed Cali Faarax
Dihnaanta Dalka Soomaaliyeed iyo Damanaanta Dadkiisa 7


Drs. Najma Cabdirisaaq
Ka Qaybgalka Gabdhaha Caafimaadka Bartay ee Kuraasta Go'aaminta 10


Axmed Siciid Nuur
Puntland 27 Sano Kadib: Horumarka, Caqabadaha Siyaasadeed iyo Xalka Mustaqbalka 13


Maxamed Mire
Maxay Jamhuuriyadda Saddexaad ee Soomaaliya Fadhiid u Tahay? 19


Bashiir Suuleey
Shumacii La Shiiqiyey: Shirkii Hormarinta Gobolka Mudug 23


Cabdiraxmaan Shiikhdoon
WAA MAXAY RAADKA UU DHISMAHA DOWLAD GOBOLEEDKA WAQOOYI-BARI KU YEELAN DOONO BIDHAANTA JUQURAAFI-SIYAASADDEEDKA SOOMAALIYA? 27


Dr. Maxamuud C/Raxmaan
WAXBARASHADA SARE IYO HOGGAAMINTA: 33


Cabdiweli Waaberi
PUNTLAND: XAGJIRNIMADA SIYAASADEED AYAA UGA HALIS BADAN XAGJIRNIMADA HUBAYSAN 38


Aadan Salaad (Badiic)
PUNTLAND: WAXGARAD WALAACSAN 27-SANO KADIB 41

# Dhambaalka Tifaftiraha

Waxaa farxad iyo bogaadin noo ah in aan soo saarno daabacaadda shanaad ee Majalladda Marag, oo ah madal aan ugu talagalnay in lagu daabaco macluumaad kala duwan sida warbixino, falanqayno, iyo aragtiyo ay diyaariyeen dad kala duwan oo ka tirsan bulshada, sida cilmi-baarayaal, suxufiyiin, aqoonyahano, hal-abuurro, iyo dadka kale oo khibrad iyo aqoon u leh dhinacyada kala duwan ee nolosha.

Majalladda Marag, oo la qorsheeyay in la daabaco hal mar bishii, waxaa aasaasay xarumaha ku midaysan Iskaashiga Xarumaha Warbaahinta Soomaaliyeed (Somali Newsrooms Coalition – SNC). Iskaashigan wuxuu ka kooban yahay xarumo kala duwan, kuwaas oo kala ah: Milgo Media, Puntland Mirror, The Daily Somalia, Dookh Press, iyo Gaashaan Dialogue.

Ujeeddada majalladdan waa in la helo madal ka duwan warbaahinta caadiga ah ee dalka ka jirta, kuwaas oo inta badan xoogga saara soo tebinta dhacdooyinka maalinlaha ah. Majalladdan waxay hiigsaneysaa inay bulshada u gudbiso macluumaad waxtar leh oo kor u qaada wacyiga iyo fahamka bulshada, kobciya doodaha iyo aragtiyaha caafimaadka qaba, soo bandhiga dhaliilo wax dhisaya oo daahfuran, islamarkaana dhiirrigeliya gaar ahaan dhalinyarada, si ay u noqdaan kuwo xog ogaal ah, si buuxda u fahma xaaladda dhabta ah, una gaari karaan go’aammo sax ah oo noloshooda iyo bulshada wax ku ool u ah.

Majaladdan waxay ka madax-bannaan tahay aragtiyaha siyaasadeed ee kala duwan ee dalka ka jira, waxayna u furan tahay qof walba oo doonaya in uu la wadaago bulshada fikrado, warbixino, iyo falanqeyn ku saleysan aqoon iyo waayo-aragnimo.

Cadadkan waxa uu xambaarsan yahay mowduucyo kala duwan oo diiradda saaraya siyaasadda, waxbarashada iyo caafimaadka, kuwaas oo ay qoreen khubaro aqoon iyo waayo-aragniba u leh qaybahan.

**Cabdi Cumar Bile**
Tifatiraha Guud

**Xigashada Sawirka**: Garaadka Macmalka ah (AI)



# DHIRAANDHIRINTA FEKERKA IYO FURSADAHA DHALLINYARADA!

Cabdullahi M. Cawsey

Burburkii dowladnimada Soomaaliya ka dib dhallinyaradu waxay noqdeen dhibanayaasha koowaad ee dowlad la'aanta. Sida tirakoobyada ay soo saartay Hay'adda Qaramada Midoobay ee Dadka (UNFPA, 2022) ay muujinayaan, boqolkiiba 75 bulshada Soomaaliyeed waa dhallinyaro, kuwaas oo badankood ku soo barbaaray duruufo adag oo laga dhaxlay burburka sida, shaqo la'aan, mustaqbal mugdi ah iyo rajo xumo.

Daraasad kale oo Bankiga Adduunka (World Bank, 2021) sameeyay ayaa tilmaantay in heerka shaqo la'aanta dhallinyarada magaalooyinka dalka iyo miyigaba ku nool uu ka badan yahay 67%, taas oo ka mid ah kuwa ugu sarreeya caalamka. Soddon iyo dheeraad sano oo rajo la'aan ah ayaa dhallinyarada ku khasabtay in duruufaha adag ku maareeyaan qaabab mugdi ah oo naftooda halis gelisa sida tahriibka badda iyo saxaraha, ku biiridda kooxaha hubaysan oo dhallinyaro badan naftooda ku waayeen jiidaha dagaalka, ku milanka kooxo diimeedyada dalka oo leh ajando gaar ah oo dhallinyaro badan ka lumisay xorriyadda fikirka iyo in ay danahooda gaarka ah gartaan, isticmaalka noocyada kala duwan balwadda oo ragaadisay maskaxda iyo caafimaadka dhallinyaro badan.

Inkasta oo tiro ahaan aad u yaryihiin, haddana waxaa jira dhallinyaro duruufahaas adag ku dhex dedaalay kuwaas oo helay fursado waxbarasho oo kooban ka dibna shaqooyin aan badnayn ka helay ganacasiga gaarka loo leeyahay iyo hay'ado shisheeye balse waa tiro aad u kooban marka la eego aqlabiyada dhallinyarada ee dhibanaha koowaad u noqday burburka dalka.

Dhinaca kale, sanadihii ugu dambeeyay, waxaa soo shaac baxayay, isbeddelo cusub oo maskaxda dhallinyarada ku socda. Waxaa muuqanayay soo ifbaxa jiil aan ku qanacsanayn inay ku noolaadaan qafis xiran iyo burbur siyaasadeed oo aan lahayn albaab furma. Waxaa si dabiici ah ku billowday in dhallinyaradu is weydiinayaan su'aalo culus: maxaa burburka joogtada ah sabab u ah? Yaa ka macaasha? Maxaase looga bixi karaa? Dhiraandhirinta fekeradan cusub waxay dhallinyaro badan siisay fursado ay isku weydiiyaan su'aalo ka madax bannaan cabsi iyo taageero indho la'aan ah. Fursadaha dhallintu heleen waxaa ka mid ah in ay curiyaan afkaar iyo doodo cilmiyaysan oo ka duwan doodihii macne la'aanta ahaa ee muddooyinkan lagu mashquulsanaa. Tusaale ahaan waxaa billowday in madallo cusub- Forums sida madasha May Fakaraan ee Garoowe oo kale in dhallinyarada ku sugan dalka gudihiisa ku soo bandhigaan aragtiyo qoto dheer, doodo cilmi ku salaysan, iyo rabitaan isbeddel oo aan lala gaban.

Marka isbeddelkan lagu eego argtiyo cuskan cilmiga-bulshada "sociology" sida Aragtida Isbeddelka Bulshada (Social Change Theory) waxay ina tusaysaa in isbeddelka ku dhacay fekerka dhallinyarada uu yahay mid dabiici ah oo ka dhalatay cadaadiska siyaasadeed, dhaqaale iyo dhaqan ee dhallinta dalka muddada dheer la noolaayeen. Tusaale ahaan, wacyiga cusub ee dhallinyarada Soomaaliyeed waa mid ka falcelinaya duruufaha adag, isla markaana tilmaamaya baahida daran ee loo qabo in isbeddel deg deg ah la helo si mustaqbalka mugdiga ah ee dalka iyo midka dhallinyaradaba loo iftiimiyo.

Dhinaca kale, Aragtida Naqdiska (Critical Theory) waxay noo tilmaami kartaa in uu billowday dhadhaqaaq feker oo muujinaya loollanka ay tahay in marwalba u dhexeeyo kooxaha ka macaasha awoodda siyaasadeed iyo dhaqaale ee dalka "elite"-ka iyo dhallinyarada aan waxba ka helin nidaamka markaas jira. Marka Soomaaliya xaaladdeeda lagu eego aragtidan, waxaa jira kooxo qawlaysato ah oo aan elite lagu sheegi karin, balse muddo dheer ka macaashayay xaaladaha amni xumo, iyo dowlad'aanta dalka ka jirta. Sida ay caddeysay daraasad uu sameeyay African Development Bank (AfDB, 2020), waxay tilmaamaysaa in tiro yar oo siyaasiyiin iyo ganacsato ahi ay gacanta ku hayaan kheyraadka ugu badan dalka Soomaaliya.

Dhinaca kale, Aragtida Dunida noqotay Tuulada- Globalization Theory, waxay sharxaysaa sida internetka iyo isku xirnaanta adduunka ay dhallinyarada u siisay aragti ku dhiirrigelisay inay fahmaan in xaaladdan laga bixi karo, taasoo muuqata marka la eego dhallinyarada baraha bulshada – social media-ha ku soo bandhigta barnaamijyo wacyigelin ah oo ka hadlaya xaaladda adag ee dalka ku susganyahay iyo isbedellada lama huraanka ah.

Haddaba, si dhiraandhirinta fekerka iyo awooddan maskaxeed ee dhallinyarada u noqdo mid wax ka beddesha xaaladda adag ee dalka ka jirta isla markaana fursadaha dhallinyarada haystaan loo xaqiijiyo, waxaa lama huraan ah in dhallinyarada fekeraysa ay ka gudbaan heerka hadalka oo keliya, una gudbaan ficil qorshaysan oo leh yool cad. Tallaabada ugu horreysa waa in ay sameystaan ururo fikir (think tanks) iyo kooxo hawlgal bulsho oo si joogto ah u falanqeeya dhibaatooyinka jira, ayna soo jeediyaan xalal ku salaysan cilmi-baaris iyo xog sugan. Ururadan waa in ay yeeshaan hannaan shaqo oo cad, oo ay ku jiraan qorshe howleed, hab-raacyo daahfuran, iyo nidaam hoggaamineed oo ka madax bannaan qabyaalad iyo dano gaar ah. Waxaa kale oo muhiim ah in dhallinyaradu ay bartaan xirfadaha maamulka, abaabulka bulshada, iyo xirfadaha wada-xaajoodka, si ay ugu guuleystaan in fikradahooda ka dhaqan geliyaan deegaanka ay ku nool yihiin.

Si fekerka loogu beddelo ficil, dhallinyaradu waa inay ku xirmaan xarumaha cilmi-baarista, jaamacadaha, iyo hay'adaha bulshada rayidka ah ee adduunka, halkaas oo ay ka heli karaan xog iyo aqoon la tijaabiyay. Waxaa kale oo ay ka faa'iideysan karaan tiknoolajiyadda casriga ah, iyaga oo abuuranaya madalo online ah oo lagu wadaago fikrado, isla markaana la isku xiro dhallinyarada gobollada kala duwan ee dalka si ay u midoobaan. Isku xirnaantan iyo wada shaqayntan ayaa dhallinyarada ka dhigi karta xoog bulsho oo mideysan oo awood u leh inay saameyn ku yeeshaan jihada siyaasadda Soomaaliya u jihaysanayso.

Dhinaca kale, waxaa loo baahan yahay olole ballaaran oo dhallinyarada lagu baraarujinayo muhiimadda ay leedahay cod mideysan iyo ka qaybgal joogto ah dhinaca siyaasadda taas oo ku saleysan aqoonta casriga ah. Haddii ay sidaas sameeyaan, waxay abuuri karaan jiil hoggaamiya mustaqbalka dalka, kana madax bannaan qabyaalad, musuqmaasuq iyo ka ganacsiga burburka. Jiilkan cusub wuxuu noqon karaa mid ku dhisan aqoon, isla xisaabtan, iyo himilo bulsho oo mideysa Soomaali oo dhan. Isbeddelka maskaxda dhallinyarada Soomaaliyeed sidaas ayaa uu uga gudbi karaa hadal keliya, una tallaabi karaa ficil wax ka beddela taariikhda dalka.

Ugu dambayn, dhallinyarada Soomaaliyeed waxay maanta haystaan fursad dahabi ah oo ay ku noqon karaan laf-dhabarta isbeddelka dalka, haddii ay awoodaan in ay fikradahooda ku saleeyaan cilmi-baaris, ay isku abaabulaan si mideysan, ayna u dhaqmaan si mas'uuliyad leh oo ka madax bannaan qabyaalad iyo dano gaar ah. Isbeddelka feker ee soo ifbaxay waa bilowga waddo dheer oo u baahan adkaysi, wada shaqayn, iyo hoggaan hufan. Haddii awooddaas feker loo beddelo ficil qorshaysan, waxaa suurto gal ah in jiilka maanta uu noqdo mid dhisa Soomaaliya cusub, ka caddaalad badan, oo ka mideysan tii burburtay. Isbeddelkan ma aha oo keliya rajo, ee waa waajib taariikhi ah oo saran dhallinyarada maanta!

**W/Q:** Cabdullahi M. Cawsey,

Psychotherapist/ Writer




**Xigashada Sawirka:** AI



Xigashada Sawirka: AP

# DIHNAANTA DALKA SOOMAALIYEED IYO DAMANAANTA DADKIISA

Dr. Maxamed Cali Faarax

# HORDHAC

Qormadan waxa ay si kooban u iftiiminaysaa khayraadka dhulka Soomaalida ku duugan iyo sida ay dadka Soomaalida ahi uga baahan yihiin, ugana faa'idaysan la' yihiin. Sidoo kale waxa ay qordmadu ka hadlaysaa sida dadka Soomaaliyeed ee leh dabeecadaha firfircoonaanta, xoog-furnaanta, maskax-furnaanta iyo hal-abuurka ay ugu guuldaraysteen in ay dhistaan dowlad danahood iyo masaalixdooda ilaalisa, ugana faa'idaysa khayraadka dhex-ceegaga dalkooda oo dabooli kara baahidooda.

# DHULKA SOOMAALIDA

Sida la wada ogsoon yahay, Soomaaliya waa dal ku yaala Geeska Afrika oo ku fadhiya dhul bedkiisu dhan yahay 637,657 km2, lehna xeeb dhererkeedu dhan yahay 3,000 km oo ay ka buuxaan khayraad fara badan oo lagu takrifalo, sida ay warbixinadu sheegayaan, waxaa sannad kasta si sharci-darro ah looga jillaabtaa kaluun gaaraya 132 kun oo metric ton, kaasoo qiimihiisu gaarayo $306 milyan oo doollar.

Dhulka Soomaalidu waa dhul qurux badan oo noocya badan, waxaana ka mid ah silsilada buuraladayda ee Golis ee dhererkeedu dhan yahay 2,408 km, taas oo Alle ku galladay macdan farabadan oo uu dahabku ugu horeeyo. Dhul daaqsimeedka ay dhirtu ku badan tahay ee ku haboon xoolaha (geela, ariga iyo lo'da) oo horay oomane u ahaa, ayaa hadda yeeshay ceelal iyo berkado sida uu Cabdisalaan Shiikh ku qoray buuggiisa **"Taariikhda Soomaalida iyo Tartanka Qabiilka".** Inta badan dhulka Soomaaliya waa oomane oo sannadkii hela roob celcelis ahaan u dhaxeeya 50-200mm.

Dhulka Soomaaliyeed waxa uu xuduud la leeyahay marinka Baabul-Mandab oo ah marin-badeed istiraatiiji ah oo ku dhawaad 12% ganacsiga caalamiga ah uu maro sanadkii, iskuna xira biyaha Gacanka Cadmeed, Badda Cas iyo Kanaalka Suways. Dhanka kale, u furan Badweynta Hindiya, taasoo ka dhigaysa goob leh saamayn siyaasadeed, dhaqaale iyo mid amni. (Geeska Afrika: goob istiraatiiji ah oo murugsan: Majaladda Marag- Cadadka 2-aad). Qiimaha istiraatiijiyeed ee dhulka Soomaaliyeed, waxa ay abuurtay loollan dhexmara quwadaha waaweyn ee adduunka, iyadoo cid walbaa ay danayso inay saamayn siyaasadeed, amni iyo mid dhaqaalaba ay ku yeelato Soomaaliya.

Dhulka Soomaalidu waa dhul hodan ah, oo leh dhul beereed ku wanaagsan beerashada, labo webi oo sanadka intiisa badan qulqula, iyo macdan iyo shidaal ay caddeeyeen baritaano badan oo laga sameeyey Soomaaliya, gaar ahaan intii xorriyada la qaatay ka dib. Hay'adda Cuntada Adduunka (FOA) warbixin ay soo saartay waxay ku sheegtay in Soomaaliya ay adduunka kaalinta koowaad kaga jirto dhinaca xoolaha nool, waxayna intaas ku dartay in xoolaha Soomaalidu muddadii u dhaxaysay 2014 ilaa 2023 ay tiro ahaan gaareen 59.9 milyan oo neef oo isugu jira: Geel, Lo' iyo Ari.

# DADKA SOOMAALIDA

Diinta Islaamka oo Soomaaliya soo gaartay xilli hore (qarnigii 1-aad) oo ku soo gaartay si nabad ah (silmi), ayaa sababtay in ay dadka Soomaaliyeed noqdaan dad Muslim ah 100%. Arrintaas oo ka mid ah waxyaabaha ugu weyn ee isku-xira oo mideeya ummadaha. In kasta oo dhowaan ay soo baxeen aragtiyo diimeed oo hardamaya, haddana, dadka Soomaaliyeed waa dad ay midayso mad-habta Shaaficiyada oo muddo dheer ka jirtay Soomaaliya. Waxa kale oo adkeynaya midnimada ummada Soomaaliyeed waxa ka mid ah afka, dhaqanka, dhalashada, is-dhexgalka bulshada, midabka iyo muuqaalka dadka. Iyada oo ay jiraan arrimahaas iyo kuwo kale oo isku xiraya bulshada, haddana waxa aan ilaa iyo hadda jawaab waafi ah loo helin sida aysan weli Soomaalidu u mideysnayn oo uu dhexdooda uga jiro khilaaf muddo dheer soo jiray.

Sida uu Dr. Afrax ku qoray buuggiisa "Dal Dad Waayey iyo Duni Amiir Beeshay", tilmaamaha kale ee taageeraya isku xirnaanta iyo dadnimada ee ay Soomaalidu leedahay, waxaa ka mid ah niyadda wanaagsan, maskax furnaanta, firfircoonida, fahanka, hal-abuurka, iyo la qabsiga deegaanada kala duwan. Arrintaas waa mid ay qireen xeeldheerayaal ajnabi ah oo u kuur galay cilmiga barashada bulshooyinka.

Dhinaca kale, cilladda ugu weyn ee baabi'isay waxyaabaha mideeya ummada waa qabyaalada oo noqotay dilaa aan daawo lahayn, cid kastana si fudud u adeegsato, iyadoo doonaysa in ay hesho dan gaar ah. Cilladaha kale ee Soomaalida

waxaa ka mid ah: laab-la-kac (caadifadda) oo hogaamisa dadka, halkii caqliga lagu socon lahaa. Sidoo kale waa ummad aan wax ka baran taariikhaha soo maray sida uu tilaamay abwaan Abshir Bacadle" Durba waxay ilowdaa umulli dihashadeediiye".

Waxaa kale oo Soomaalida lagu tilmaamaa inay yihiin indha-ku-garaadle, kuwaas oo inta badan ka fekeraya waxyaabaha u muuqda, ee aan lahayn aragti fog. Tilamaamaha kale ee wiiqay midnimada Soomaalida waxaa ka mid ah, dulqaad yarida, sida uu Dr. Afrax tilmaamay:" Dadka Soomaaliyeed waa hanfade hadba meel ku booda, oo aan samir iyo dulqaad u yeelan waxay doonayaan ama ay goostaan. Dabeecadaha cusub ee dhowaan soo biiray waxaa ka mid ah been abuurka, xishood la'aanta, danaysi iyo xaasidnimo lagu faylo goynayo qofka isku daya inu uu wax qabto ama u xusul-duuba daryeelka danta guud.

Inkastoo dadka Soomaalidu leeyihiin karti badan iyo waxyaabo badan oo xoojiya midninmada, haddana meesha loo dhintay oo dawladnimada Soomaalidu ka hanaqaadi wayday waa hoggaanka. Dr. Afrax wuxuu yiri: "Waxa aan noqonay ummad ku guul darraysatay in ay dhasho hormuud ama gar-wadeen leh karti iyo daacadnimo dal lagu hoggaamiyo. Wixii ka dambeeyey dhaqdhaqaaqii SYL iyo SNL, waxaa muuqata in ay Soomaaliya ka dhalma-deysey hanaddo u qalma hoggaamin ummadeed, hankooduna gaarsiisan yahay heerka ah in ay qaran dhisaan, taariikhdana galaan, sida qayrkood yeelo inay ku camal falaan murtida tiraahda "Waari mayside war hakaa haro".

# GUNAANAD

Waa arrin muuqata in aysan Soomaaliya helin hoggaamiyeyaal qori-isku-dhiib ah ama isku xig-xiga oo waddanka gaarsiiya horumar iyo midnimo ay kula tartami karaan deriskooda iyo dunida kaleba. Muddadaan dambena waxa soo is if baxay hogaamiyeyaal ka macaasha siyaasadda, ka fakara dantooda khaaska ah, haddaba, su'aashu waxa ay tahay: "Xagee salaadu iska qaban la'dahay", haddii ay jiraan qodobo badan oo isku-xiraya umadda sida diinta, dhaqanka, dhalashada, afka, dubka; dalkeennuna yahay dal ballaaran oo ka baaxad weyn tirada dadka Soomaaliyeed, haddana kheyraadku ceegaago bad, beri, buur iyo bannaan.

**W/Q:** Dr. Maxamed Cali Faarax



**Xigashada Sawirka:** AP



Xigashada Sawirka: AI (Garaadka Macmalka ah)

# KA QAYBGALKA GABDHAHA CAAFIMAADKA BARTAY EE KURAASTA GO’AAMINTA

Drs. Najma Cabdirisaaq

# HORDHAC

Dalka kasta oo horumarsan wuxuu ku dhisan yahay adeegyo bulsho oo tayo leh, gaar ahaan adeegyada waxbarashada iyo caafimaadka hase ahaate dalka Soomaaliya waxa uu wajahayaa caqabado badan oo dhinaca horumarka ah, gaar ahaan dhanka caafimaadka. Kahor intaan la gaarin horumar la taaban karo waxaa lama huraan ah in la fahmo kaalinta ay haweenka, gaar ahaan gabdhaha caafimaadka bartay, ku leeyihiin hagaajinta adeegyada bulshada.

Gabdhaha Soomaaliyeed ee xirfadda caafimaadka leh waxay door muhiim ah ka ciyaaraan samatabixinta bulshada, gaar ahaan xilliyada dhibaatooyinka sida colaadaha, abaaraha iwm. Balse si kastaba ha ahaatee, doorkooda waa uu xaddidan yahay marka ay timaado go'aamada sare ee siyaasadda iyo maamulka hay'adaha caafimaadka. Maqaalkan wuxuu falanqeynayaa muhiimadda gabdhaha caafimaadka bartay ay u leeyihin ka qaybgalka ama ka qayb qadashada go'aamada sarsare.

Sida aan ognahay gabdhaha caafimaadka bartay waxay buuxiyeen baahi weyn oo dhinaca shaqaalaha caafimaadka ah, iyagoo ah laf-dhabarka isbitaallada, rugaha caafimaad, iyo xarumaha daryeelka hooyada iyo dhallaanka. Waxay ku sugan yihiin meelaha ugu fog ee dalka, iyagoo si toos ah uga jawaabaya baahiyaha caafimaad ee bulshada. Si kastaba ha ahaatee, waxay si weyn uga maqan yihiin kuraasta go'aaminta arimaha caafimaadka iyo maamulkiisa – sida wasiirrada, agaasimayaal guud, iwm. taas oo sababtay in baahiyaha dhabta ah ee bulshada gaar ahaan hooyada iyo carruurta aan si buuxda loo metelin ama aan loo fahmin xaaladahooda.

# MUHIIMADA KA QAYB GALKA GO'AAMADA SARSARE

WHO (2019), ayaa sheegtay in haweenka ay yihiin 70% shaqaalaha caafimaadka aduunka, laakiin kaliya 25% ayaa gaara jagooyinka sar- sare ee go'aan gaaridda. Halka Soomaaliya gudaheeda lagu qiyaaso in shaqaalaha caafimaadka ay 80% yihiin haween, laakiin madaxda wasaaradaha iyo hay'adaha caafimaadka ay inta badan rag yihiin, taas oo mujinaysa in aan si dhab ah looga faaidaysan gabdhaha caafimaadka bartay fahamka qotoda dheer oo ay u leyihiin baahiyaha caafimaad ee bulshada, gaar ahaan dumarka iyo carruurta. Waxaa xaqiiq ah marka ay gabdhahaasi ku jiraan kuraasta go'aaminta ama go'aan gaarista in ay horseedi karaan siyaasad caafimaad oo ku saleysan xaqiiqada dhabta ah iyo waaya-aragnimada tooska ah ee baahida bulshada

Dalal badan oo horumaray ayaa guulo muuqda ka gaaray yareynta dhimashada hooyada iyo dhalaanka iyo kor u qaadidda tayada adeegyada caafimaad, kadib markii ay haweenka caafimaadka bartay ay fursad u siyeen ka mid noqoshada hogaanka iyo miisaska sarsare ee go'aan gaarista. Dalka Rwanda, tusaale ahaan, haweenka ayaa si weyn loogu daray hoggaanka caafimaadka, taasoo horseeday in hoos u dhac weyn ku yimaado dhimashada hooyada iyo dhalmada aan badbaadsanayn (The Lancet, 2021). Tas oo muujisay ama caddayn u noqotay in marka haweenka lagu daro hoggaanka, ay siyaasadda caafimaadka noqon karto mid wax ku ool ah oo ku salaysan baahida dhabta ah ee ka jirta bulshada.

Soomaaliya waxay ka mid tahay waddamada aadka ula liita helitaanka adeegyada caafimaad ee la isku halleyn karo. Sida uu sheegay Hay'ada Qaramada Midoobay u qaabilsan Dadweynaha (UNFPA), Soomaaliya waxay ka mid tahay waddamada ugu sarreeya ee uu ka jiro heerka dhimashada hooyada iyo dhallaanka. Warbixinta UNFPA ee 2023 waxay muujisay in hooyo kasta oo Soomaaliyeed ay wajahdo khatar weyn oo ah dhimasho xilliga uur-qaadida iyo xiliga dhalmada, taasoo inta badan ka dhalata helid la'aanta adeegyo caafimaad oo badbaado leh, sidaas darteed waxaa laga maarmaan ah in la fahmo oo la fuliyo xeelad kasta oo arrintaas lagu hormarin karo loogana baaqsan karo khataraha ka dhalan kara iyo kaalinta ay haweenka ama gabdhaha caafimaadka bartay ku yeelan karaan.

# CAQABADAHA HORTAAGAN KA-QAYBGALKA

Inkasta oo ay muhiim tahay in haweenka xirfadlayaasha ah laga qayb- geliyo go'aamada sarsare ee arrimaha hormarinta siyaasadda caafimaadka, haddana waxaa jira caqabado dhowr ah oo hor taagan:

- Dhaqan bulsheed oo weli u arka in gabdhaha xirfadda caafimaadka bartay aysan door muuqda ku yeelan karin arrimaha siyaasadda ama aysan muhiim u ahayn oo in xirfaddooda kaliya ay ku shaqeeyan uu yahay doorkooda.
- Fursad iyo tababar la'aan ku aadan hoggaaminta iyo maamulka sare, taasoo keenta in ay isu arkaan in kaliya ku howlgelida xirfadda caafimadka ay ka masuulyihiin.
- Koobnaanta fursadaha siyaasadda ay helayaan.

Caqabadahaas iyo kuwo kale oo badan oo intooda badan la xiriira dhaqanka Soomaalida oo lagu tilmaamo (male-dominated society) in raggu ay taliyaan ama hoggaanka u badanyihiin ayaa keenay in ay waayaan fursad ay ku so bandhigaan aqoontooda iyo waayo aragnimada ay u leeyihiin xallinta iyo dajinta siyaasad guul looga gaari karo arrimaha hoos u dhigaya tayada caafimaadka dadka iyo dalka.

# TALO SOO JEEDIN

Waxaan aaminsanahay in haddii diiradda la saaro dhowrkan arrimood, ay suurtagal noqoneyso in gabdhaha caafimaadka bartay ay door muuqda ka qaataan hoggaaminta iyo ka qaybgalka miisaska sare ee go'aan qaadashada.

- Waxaa muhiim ah in la dhiso barnaamijyo tababar hoggaamineed ah oo si gaar ah loogu talagalay gabdhaha caafimaadka bartay. Sidoo kale la dejiyo siyaasado iyo sharciyo damaanad qaadaya qoondada haweenka ee kuraasta go'aaminta.
- In la sameeyo wacyigelin ballaaran oo bulshada lagu barayo muhiimadda hoggaaminta gabdhaha cafimaadka bartay ay u leyihiin dejinta iyo fulinta arrimaha siyaasadda caafimaadka.
- In laga faa'iideysto tusaalooyinka dalalka kale oo la hirgeliyo hab-raacyo waxtar leh, si looga jawaabo baahida dhabta ah ee bulshadda.

# GUNAANAD

Ugu Dambayn, gabar caafimaad baratay waa hanti qaran oo u baahan in la maalgaliyo, la dhiirrigeliyo, lana siiyo cod ay kaga qayb qaadato hagaajinta adeegyada bulshada. Gabadha markay caafimad barato waxay wax tar u leedahay marka hore waalidkeed, marka xiga qoyskeeda, ka dibna bulshada inteeda kale.

Aqoonta iyo waayo-aragnimada ay gabdhahaasi caafimaadka bartay u yeelan karaan baahiyaha ka jira caafimaadka bulshada, waxay suurtagelin kartaa inay door firfircoon ka qaataan dejinta siyaasadaha dalka. Tani waxay sidoo kale fure u noqon kartaa in dalku yeesho adeegyo caafimaad oo u dhigma baahida dhabta ah ee bulshada.

Dowladda, hay'adaha samafalka, jaamacadaha, iyo ururrada xirfadeed waa in ay si wadajir ah u abuuraan nidaamyo xoojinaya doorka hoggaamineed ee haweenka. Waana lama huraan in la yareeyo caqabadaha hortaagan, laguna dhiirrigeliyo in ay noqdaan kuwo ka dhex muuqda go'aamada siyaasadeed ee saameeynaya nolosha dadka Soomaaliyeed.

**W/Q:** Drs. Najma Cabdirisaaq



Xigashada Sawirka: Qurkavic

# PUNTLAND 27 SANO KADIB:

## HORUMARKA, CAQABADAHA SIYAASADEED IYO XALKA MUSTAQBALKA

Axmed Siciid Nuur

# HORDHAC

Horaantii bishaan Agoosto Puntland waxay xustay sannadguuradii 27-aad, waa muddo wax yar ka badan rubuc qarni, muddadaas Puntland jirtay waxay yeelatay 6 madaxweyne oo si nabad ah xilka isku wareejyey. In kastoo madaxweynihii ugu horeeyey iyo madaxweynaha hadda joogaa uu mid weliba laba xilli xukunka qabtay ka dib khilaaf iyo muran siyaasadeed oo ugu dambayntii laga gudbay.

Agoosto 30, 2025, waxaa looga dhawaaqay Laascaanood maamuul goboleed la magac baxay Waqooyi Bari Somaaliya oo ay samaysteen gobolo ka mid ah kuwii wax ka dhistay Puntland, Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa dhismaha maamulkaas garwadeen ka ah, sidoo kalena aqoonsatay halka xukuumadda Puntland ayaa iyadu aaminsantahay in goboladaas ay weli ka tirsan yihiin maamulka Puntland sifo sharci ahna aysan u kala bixin. Xiriirka Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Puntland ayaa gaaray halkii ugu xumaa oo uu abid gaaro, Puntland waxay mustaqalka dhow la tacaali doontaa mowjado siyaasadeed iyo kuwo amni oo kaga imaan doona goboladaas ay hadda Dowladda Federaalka Soomaaliya ay maamulka ka dhistay.

Puntland ayaa muddo sideed bilood ah dagaal culus kula jirta kooxda argagixisada ah ee Daacish, kuwaas oo ku sugan Buuraha Caalmiskaat ee gobolka Bari. Dagaalkan ayaa ilaa iyo hadda laga gaaray guulo muuqda. Guusha ugu weyn ee Puntland ku tallaabsatay ayaa ah inay si buuxda uga hortagtay in kooxdaasi qabsato dhulkeeda, taas oo ah arrin muujinaysa adkeysiga iyo is-kaashiga shacabka iyo dowladda. Puntland waxaa soo maray dagaallo dhowr ah oo ay si wadajir ah uga hortageen shacabka iyo ciidamada dowladda, taasoo keentay iskaashi xooggan oo ka dhashay difaaca deegaannada. Isku-duubnidaasi waxay si weyn uga hortagtay in kooxaha argagixisada ahi saldhigyo ka samaystaan gudaha Puntland. Arrintan ayaa si cad uga duwan xaaladda ka jirta qeybo kale oo dalka ka mid ah, gaar ahaan gobollada koonfureed ee Soomaaliya, halkaas oo argagixisadu fursado ku heleen inay ku baahaan.

Maqaalkan waxaan ku eegayaa horumarka laga sameeyay dhinaca siyaasadda, iyo sidoo kale caqabadaha iyo arrimaha laga gaabiyey ee u baahan in mustaqbalka si dhab ah loo wajaho. Arrimaha la xiriira amniga, bulshada iyo dhaqaalaha waxaan kaga hadli doonaa maqaallo kale, haddii Eebbe idmo.

# SIYAASADDA

Puntland inta badan waxaa la dhihi karaa waxaa ka jiray xasilooni siyaasadeed. Doorashooyin aan toos ahayn (indirect elections) oo baarlamaani ah kuna salaysan xulasho odaayaasha qabiilka. Nidaam dowladeed oo higsanaya Soomaliya federaal ah oo xukunku u qaybsan yahay dowladda dhexe iyo dowladaha xubnaha ka ah federaalka. Himiladaas federaalaynta ah in kastoo horumar laga sameeyey hadana weli waxaa jira caqabado waaweyn oo soo wajahay hirgelintiisa.

Himiladii labaad ee Puntland loo aas-aasay waxay ahayd in la bixiyo adeegyo bulsho sida amniga, kobcinta dhaqaalaha, horumarinta siyaasadda, iyo shaqo-abuurka. Hase yeeshee, waqtigan Puntland waxay wajahaysaa duruufo adag oo ay ka mid yihiin dhaqaale-xumo, shaqo-la'aan baahsan, dhalinyaradii oo si weyn u tahriibaysa, qoysas badan oo u guuraya dalalka deriska ah, ganacsatadii oo maalgelintoodii u wareejiyey meel kale, kalsoonidii iyo midnimadii bulshada oo hoos u dhacday, iyo tabasho ballaaran oo bulshada ka qabto waxqabadka iyo horumarka dowladooda—dhammaantoodna waa xaqiiqooyin dhab ah oo maanta ka jira Puntland.

# BAAHSANAANTA XUKUNKA

Baahinta xukunka waxay ka dhigan tahay in talada lagu dhoweeyo shacabka, adeegyada dowladda la horumariyo, isla xisaabtanka la xoojiyo, dadka fursad loo siiyo inay la xisaabtamaan masuuliyiintooda, awoodda shacabka kor loo qaado, isla markaana bulshada loo jiheeyo laguna wacyigeliyo inay ka shaqeeyaan danahooda. Si

kastaba ha ahaatee, bilowgii horeba shacabka ayaa maamulka ku dhaliilay inuu yahay mid talada iyo awoodduba ku urureen hal meel, oo ay gacanta madaxweynaha kaliya ku jiraan, halka go'aannada masiiriga ah aan lagu samayn wada-tashi dhex mara golayaasha dowladda iyo mid shacabka toona.

Dadku waxay u bixiyeen naanaysta "Madax ka nool," taas oo noqotay magac caan ah oo si weyn ugu dhex faafay dowladnimada Puntland. Arrintaas waxay muujinaysaa in tan iyo bilowgii ilaa maanta aan si dhab ah loo hirgelin baahinta iyo wadaagga talada Puntland. Inkasta oo maamulka Puntland ku salaysan yahay mabda'a xukun baahinta iyo federaalaynta, haddana waxaa muuqata in gudaha Puntland awoodda dowladnimo aanay si siman ugu qaybsanayn hay'adaha dowladda sida baarlamaanka, garsoorka, iyo kuwo kale, isla markaana isla xisaabtanka iyo is-dheelitirka awoodaha dowladeed uu aad u hooseeyo.

## NIDAAMKA QOF IYO COD IYO ABUURISTA XISBIYO SIYAASADEED

Puntland waxay hirgelisay nidaamka doorashada qof iyo cod oo laga fuliyey 36 degmo, taas oo ahayd tallaabadii ugu horreysay ee Puntland u qaaddo dhinaca xukun-baahinta. Inkasta oo ay jireen caqabado iyo ceebaha ka muuqday habraaca, haddana waxay ahayd tallaabo muhiim ah oo kor u qaaday ka qaybgalka bulshada ee siyaasadda. Sannadkii 2021-kii, markii ugu horreysay ayay shacabka codkooda ku doorteen golayaal deegaan, iyadoo nidaamka lagu tijaabiyey saddex degmo ka hor inta aan loo gudbin degmooyinka intooda kale.

In kasta oo taladii is-xukunka gacanta loo geliyey dadka deegaanka, haddana sida ay golayaasha deegaanku u hawlgaleen iyo qorshaha qabyada ah ee ku saabsan xukun-baahinta, waxaa durba muuqday in hab-dhaqanka golayaashaasi uu bulshada ka niyad-jabin karo barnaamijka qof iyo cod, sida ay hore ugu dhacday intii u dhexeysay 1960–1969.

Guusha laga gaari karo nidaamka qof iyo cod waxay ku xirnaan doontaa afar arrimood oo waaweyn.
Kow, waa dejinta sharciyo dhamaystiran oo lagu maamulo doorashooyinka kala duwan, sida shuruucda xisbiyada, doorashooyinka golayaasha deegaanka iyo baarlamaanka, iyo dib-u-eegista dastuurka.
Labaad, waa abuurista xisbiyo ka madax-bannaan qof-jecleysi iyo musuq-maasuq, isla markaana si hufan uga shaqeeya nidaamka is-doorashada iyo tartanka siyaasadeed (Institutionalization of political parties).
Saddexaad, waa ka fogaanshaha danaysiga gaarka ah ee lagu dhex qariyo danaha guud, si loo dhiso dowlad ku salaysan nidaamka xisbiyada badan. Afraad, waa wacyigelinta bulshada oo si dhab ah loo hirgeliyo, loona kordhiyo garaadka iyo aqoonta dadweynaha ee ku saabsan barnaamijka qof iyo cod, laguna baraarujiyo khaladaadka ay sameyn karaan ee wax u dhimi kara hirgelinta nidaamkan.

## XUKUUMAD KOOBAN OO TAYO LEH

Xukuumad kooban waxay leedahay faa'iidooyin badan oo muhiim u ah maamulka wanaagsan. Waxaa ka mid ah yaraanta kharashka mushahaarooyinka iyo dhaqaalaha maamulka guud, taasoo suurtagelinaysa in dowladdu wax keydsato. Sidoo kale, waxay awood u leedahay inay si degdeg ah oo hufan u gaarto go'aamo waxtar leh, isla markaana ay si sahlan u la xisaabtanto masuuliyiinteeda.

Xukuumadda noocan ah waa mid si fudud loo kormeeri karo, lana ogaan karo hawlaha ay wado iyo sida ay u qabsoomayaan. Is qabqabsiga iyo khilaafaadka ka dhex dhaca golaha wasiirrada ayaa sidoo kale aad u yaraada, taasoo horseedaysa xasillooni iyo wadashaqeyn wanaagsan. Dhammaan arrimahan waxay keeni karaan in dowladdaasi noqoto mid leh karti, hufnaan iyo waxqabad muuqda.

Bilowgii dowladdii la aas-aasay, waxay ka koobnayd sagaal wasiir oo keliya. Koobnaantaas golaha wasiirrada waxay ahayd fursad dahabi ah oo haddii la joogteyn lahaa, suurta gelin lahayd in si wanaagsan loo dhiso hay'ado dowladeed oo leh xirfad, karti iyo waxtar dhab ah.

Sababta ku kalliftay madaxweynayaashii soo maray inay si xad-dhaaf ah u kordhiyaan tirada golaha wasiirrada waxay ahayd hal arrin oo keliya: qancinta qabiilka. Waxaa caan baxay oraahda ah "Qabaa'ilku ha iska dhex arkaan", taasoo ka tarjumaysa siyaasad ku dhisan raadinta raalli-gelinta beelaha halkii laga eegi lahaa tayada iyo waxtarka dowladda.

Nidaamkan ku dhisan qancinta qabiilka wuxuu sababay in tayada wasiirrada, hadday ahaan lahayd mid shaqsi ah ama mid guud, ay hoos u dhacdo si aan horay loo arag. Lama is weydiin in ay suurtagal tahay in maamul-goboleed uu qaado culayska ka dhasha 70 wasiir, wasiir ku-xigeenno iyo wasiiru-dowlayaal, iyo sidoo kale 47 hay'adood oo dowladeed, weliba iyadoo kharashka ku baxa intaas looga faa'iidaysan karo meelaha muhiimka u ah bulshada sida waxbarashada, caafimaadka, biyaha nadiifta ah, iyo dhismaha wadooyinka.

Qabiilku qof xil loo dhiibay waxba uma tarayo haddii aanu jirin adeeg bulsho oo noloshiisa wax ka beddelaya. Waxa kaliya ee bulshada wax u taraya waa helitaanka adeegyo tayo leh, hufnaan dowladeed, iyo maamulka xukuumad karti leh oo lagu dhisay aqoon, waayo-aragnimo, iyo daacadnimo.

Hase yeeshee fursadaas waa la dayacay, nasiib darro dariiqaas waa laga leexday wax yar ka dib isla muddo xileedkii Madaxweynihii kowaad dhexdiisa iyadoo marba marka ka dambaysa la ballaarinayey xubnaha golaha wasiirrada, la abuurayey wasaarado badan, wasiir ku xigeenno iyo wasiiru dowlayaal, tirada golaha xukuumadda ayaa gaartay halkii ugu sarreysay, hadda xukuumadda jirtaana waxay ka kooban tahay tiro ku dhow 70 xubnood, hay'ado dowladeed oo tiradoodu dhan tahay 47 hay'adood (eeg Qoonadada Miisaaniyadda 2025, bogga 22, Shaxda Soo Koobidda Miisaaniyadda Kharashka 2025), kharashka bilaha ah ee ku baxa hay'adaha dowladda oo ka kooban 47, sida ku cad miisaaniyadda, waa USD 10,378,509 (Toban milyan, saddex boqol toddobaatan iyo sideed kun, shan boqol iyo sagaal doollar), dhammaan qoondadaasuna waa mushahar iyo adeegga bilaha ah ee dowladda.

Dakhliga ay dowladda Puntland filayso inay sanadkan soo xareyso waxa uu dhan yahay USD 8,500,035 (Sideed milyan, shan boqol kun iyo shan iyo soddon doollar) sida ku cad guud ahaan Miisaaniyadda 2025, macluumaadkaas ku xusan miisaaniyadda ayaa si cad u muujinaya in kharashka iyo dakhliga dowladda Puntland aanay is daboolayn, hase yeeshee arrintaas si furan looguma sheego shacabka, iyadoo sanad walba ugu yaraan lix bilood oo ka mid ah mushaharka iyo adeega wasaaradaha dowladda ay ku baaqato.

# DOWLAD WANAAGA

Calaamadaha lagu garto dowlad wanaaga waxaa ka mid ah isla xisaabtan (Accountability), taasoo ah in hoggaamiyayaasha iyo saraakiisha dowladda ay qaataan masuuliyadda dhammaan waxa ka dhasha ficiladooda. Hay'adaha dowladda waa inay yeeshaan habab lagu baaro laguna ciqaabo qaladaadka iyo xadgudubyada madaxda dowladda, tusaale ahaan: abuurista hay'adda la dagaallanka musuqmaasuqa, hantidhowr karti leh oo awood u leh ilaalinta hantida dadweynaha, iyo hay'adda u xilsaaran iibka iyo qandaraasyada dowladda.

Maqaalkan kuma soo koobi karo dhammaan tilmaamaha dowlad wanaaga, hase yeeshee kuwo ugu waaweyn waxaa ka mid ah: in go'aanada loo qaato si waadax ah, furan, oo aan qarsoonayn; ku dhaqanka sharciga; ka qaybgelinta muwaadiniinta go'aanada saamaynaya masiirkooda si ay talo ugu yeeshaan; hogaamiyayaasha iyo hay'adaha dowladu inay u adeegsadaan bulshada, isla markaasna ka jawaabaan baahida bulshada ee aan ka adeegan; bulshada oo dareemaysa inay talo ku leedahay dowladnimadeeda; iyo la dagaallanka musuqmaasuqa.

Akhristaha ayaan u dhaafayaa inuu qiyaaso heerka aan ka joogno arrimaha kor ku xusan ee lagu qiyaaso dowlad wanaaga. Bal qiyaas inta heshiisyo dibadeed ay gashay xukuumadda Puntland sida Dekedaha, ciidamo, macdan baarista iyo kuwo kale, oo aan intaba baarlamaanka Puntland ka doodin, falanqayn, ama ansixin? Tani waxay muujinaysaa in dowladnimada Puntland aysan weli ku dhaqmin isla xisaabtanka iyo hufnaanta loo baahan yahay si loo gaaro dowlad wanaag dhab ah.

# MAAMULKA CUSUB EE GOBOLDA WAQOOYI BARI

Dowladda Federaalka waxay dadaal badan gelisay si ay maamul u samayso gobollo horay uga tirsanaa Puntland, sida Sool, Sanaag, iyo Ceyn, kuwaas oo weli aan si sharci ah uga bixin nidaamka dowladnimada iyo dastuurka Puntland oo ay horay uga tirsanaayeen. Dowladda Federaalka waxay ka faa'iidaysatay fursad Puntland ay dayacday, ka dib markii Puntland ay siyaasad cad ka yeelan weyday oo ay kula jaanqaadi waayday dareenka iyo kacdoonka bulshada ee ka soo if baxay shacab weynaha gobolladaas, khaas ahaan gobolka Sool iyo Ceyn. Dareenkaas ayaa ku saabsanaa inay helaan maamul goboleed gaar u ah oo ka shaqeeya danahooda.

Madaxweynaha Puntland Siciid Cabdullaahi Deni waxa uu si wanaagsan u soo dhoweeyey go'aankii reer Khaatumo ee 6-dii Febraayo 2023. Si kastaba ha ahaatee, wixii markaas ka dambeeyey, Maamulka Puntland wuxuu u muuqday mid doortay siyaasad ku saleysan "sug oo dhawr" (wait and see), halkii ay ahayd in ay si firfircoon uga falceliyaan xaaladda taagan. Dhanka kale, siyaasiyiinta Dowladda Federaalka ayaa si dhaqso ah uga falceliyey dareenka bulshada gobolladaas, inkastoo ay u muuqato in danaha ugu waaweyn ee ay halkaas ka leeyihiin ay la xiriiraan doorashada 2026. Haddana, xaqiiqdu waxay tahay in Dowladda Federaalka si xeel dheer ula jaanqaadday dareenka bulshada, taas oo uu door muhiim ah ka ciyaaray hoggaamiyihii ku meel gaarka ahaa ee maamulka SSC-Khaatumo.

Waxaa jiray hadallo iyo ballanqaadyo badan oo ay dowladda dhexe ku kasbatay quluubta shacabka gobolladaas, kuwaas oo ay kamid yihiin dhismaha waddooyin iyo dekedo waaweyn oo maamulka Waqooyi Bari yeelan doono. Si kastaba ha ahaatee, ballanqaadyadaasi waxay u muuqdaan kuwo afka un ah, oo aan wali u gudbin waxqabad muuqda—taas oo dadka deegaanka lagu kasbanayey.

# TALO SOO JEEDIN

- Ku dhowaad 30-sanno oo Puntland jirtay wax badana u qabsoomeen caqabado badan oo kuwa aan kor ku soo sheegay iyo kuwo kaleba ay jiraan, waxaa lagama maarmaan ah in Puntland qabsato shirweyne dib u eegis ah oo lagu falaanqeeyo wixii la soo maray isla markaasna lagu jaangooyo qorshayaasha siyaasadeed, dhaqaale , amni iyo bulsho 30-sanno ee soo socda, dib u qaabaynta siyaasadda (political reform), dib u qaabaynta iyo tayayenta Hay'adaha dowladda (institutional reform), dejinta fikrado cusub oo lagu kobcinayo dhaqaalaha, isku tashi bulsho waa lagama maarmaan maadaama isbedel weyn uu ku yimid siyaasadaha caalamka, cid kastaana maanta ay ka fekerayso danteeda gaarka ah.

- Sii wadista barnaamihka qof iyo cod, 2029 waxaa looga fadhiyaa Puntland doorashooyin isku dhafan oo ay ka mid yihiin; doorashada deegaanka ama dowladaha hoose, baarlamaanka iyo madaxtooyada, waxay u egtahay in sadexdaas doorasho isku soo beegmi doonaan isku waqti. Waxaana lagama marmaan ah in la dhammaystiro shuruucda doorashooyinkaas khaas ahaan shuruucda doorashada baarlamaanka iyo madaxtooyada. Haddii hawshaas aan dhaqso loogu diyaar garoobin oo ay noqoto in si boobsiis ah loo qabto marka waqtigu soo dhowaado sidii dhacday 2023, waxaa dhici karta in ay abuurmaan carqalado siyaasadeed iyo amni oo dib u dhac ku

keena jiritaanka Puntland.

- Waxaa lagama maarmaan ah Puntland inay la timaado siyaasado cusub oo ay kula dhaqmayso Dowladda Federaalka, xal maaha siyaasada ku salaysan goynta xirrirka iyo wada shaqaynta, waa in laga fekeraa siyaasad taas ka duwan oo Puntland ku ilaalin karto danaheeda siyaasadeed iyo dhaqaale iskagana yarayn karto colaada kaga imaan karto khilaafka Dowladda Federaalka, siyaasad ku dhisan iska ilaali oo isku ilaali, marna haka maqnaan miiska danta Soomaliyeed lagu go'aaminayo, dantaada si xirfadaysan u dhacso, kasbo saaxiibo siyaasadeed marna xal maaha Puntland inay go'doon ka noqoto talada ay wax ku leedahay oo lagu maaraynayo arrimaha Soomaaliya, ha sugin inaad la tacaasho mawjadaha siyaasadeed oo ku wajahan Puntland marka ay kadinka kuu yimaadaan, daadku uu guriga kuugu soo galo (reactive) taas bedelkeeda la imow qorshahaaga xilli fiican, samayso barnaamij aad kula falgalayso mawjadaha socda oo aad khatarta ka imaan karto ku wajahayso (proactive). Ka hortaga ayaa ki fiican ka dabataga.

- Puntland waxay wajihi doontaa mustaqbalka dhow caqabado siyaasadeed iyo kuwa amni oo kaga imaan doona gobolada dastuurkeeda ka tirsan oo hadda looga dhawaaqay dhsimaha maamulka Waqooyi Bari, laba arrimood ayaa horyaal Puntland inay kala doorato, tan kowaad waa qorshe ku salaysan inay muran geliso dhismaha maamulkaas, sheegato deeganadaas, taasoo ay kaga imaan karto caqbado siyaasadeed, amni iyo xasilooni darro, sii kala fogeyn karta dadka walaalaha ah oo Puntland wada dhistay 1998, waxaa suurtagal ah inay taasi faa'iido u noqon karto daneeyayaal siyaasdeed oo ka baxsan Puntland, qiimo weyn bay ugu kici doontaa Puntland iyo maamulka hadda ka go'ay labadaba haddii ay jidkaas qaado. Arrinta labaad waxa weeye jid kaas ka duwan oo ah in wixii qaldamay la saxo, Puntland ay shir iclaamiso, shirkaas oo ay ku casunto madaxda maamulka halkaas lagaga dhawaaqay, isimada goboladaas, waxgarad iyo isimo laga soo xulay inta kale oo Puntland, shirkaas oo looga tashanayo mustaqbalka iyo dib u qaabaynta Puntland, sida wax loo wadaagi karo waxna loo kala yeelan karo mustaqbalka. Waxaa muuqata in Puntland mar horeba dooratay arrinta hore oo ah inay muran siyaasadeed iyo sharci geliso maamulkaas, xoog iyo xeeladna geliso sidii ay uga hortegi lahayd inuu maamulkaasu hirgalo.

- Musuqmaasuqu waxuu dhibaato weyn ku hayaa dowladnimada Puntland, siyaasadu waxay ku shaqaysaa laaluush iyo lacago la kala qaato si madax loo noqdo, horumarka dhaqaalaha waxaa curyaamiyey musuqa, lunsashada hantida dadweynuhu waxay iska noqotay wax caadi ah, dadku waaba ku bogaadiyaan qofkii hantida daweynaha lunsada, musuqmaasuqa wuxuu dhex qaaday dhiiga iyo dhuuxa dadka reer Puntland badankooda, dowladnimo iyo musqmaasuqna meel ma wada galaan. Hadaba dowladda Puntland iyo dadkeeda waxaa laga rabaa inay la yimaadaan barnaamijyo wax tar leh oo musuqmaasuqa lagula dagaalamo haddi kale dowladnimo macne leh ha ka samraan.

**W/Q:** Axmed Siciid Nuur




**Xigashada Sawirka:** Qurkavic

# MAXAY JAMHUURIYADDA SADDEXAAD EE SOOMAALIYA FADHIID U TAHAY?

Dr. Maxamed Mire



Xigashada Sawirka: AI

Iyadoo maanka lagu hayo hurgumihii iyo qaranjabkii uu dhaxalsiiyey Maxamed Siyaad Barre bulashada Soomalida, waxaa la isla qaatay in la raadiyo hannaan maamul oo isku soo celin kara dadkaan kala irdhoobay iyadoo "laab-xaarnaan" lagu eegayey dhibkii ka dhashay 26 Janaayo 1991, mana jirin sida waddamada qaar ka dhacaan dagaalada sokeeye in la raadiyo hannaanka Caddaaladda Kumeelgaarka ah "Transitional Justice" oo lagu soo afjaro xasaradaha hubaysan iyo saamaynta kalitaliska ku reebo bulshooyinka dhexdooda, waxaase ayaandarro noqotay, in aan la is waydiin-ba; side baynu u xallinaa dhibkii nafeed iyo boobkii hanti ee laga dhaxlay qaranjabkaas. Maxaa yeelay, waxaynu goob-joog u aheyn saamaynta ay ku yeelatay maxkamddii "Gacaca Courts" dowlad-dhiska Rwanda iyo sidii looga garnaqsaday dhibbaatadii dhacday 1994, taasoo dhaxalsiiyey inay dib-u-yagleelaan dowlad seeskeedu adagyahay, kala tabasho-na aysan jirin, mar qura ayay dib u istaagtay, hormurar dhan walba lehna ku tallaabsadeen.

Laabxaarnaatii lagu dhisay Jamhuuriyadda Saddexaad ee Soomaaliya ayaa noqotay, mid saameynteedu soo ifbaxdo mar'allaale iyo markii dowladdu ka weecato dhabihii la isla qaatay inay ku shaqayso. Kala gurasho, cabbasho joogta ah, iyo tagtadii oo la faaqido, ayay qabaa'ilku la soo istaagaan fagaarayaasha, taasoo keenaysa, kalsoonidarro wayn oo lagu qabo, dadka markaa hoggaanka u haya dowladda, iyagoo awooda dowladda qofeynaya, kana weecanaya jidkii lagu wada heshiiyay iyo bulshada oo aan weli ka soo bogsan xasaradihii dhiigu ku daatay ee ka hor 2000 dhacay.

Haddaba, waxaan qormadaan ku faaqidayaa walwalka iyo walaahowga isasoo taraya ee keeni kara inay Jamhuuriyada Sadexaad alleysato, anagoo isweydiinayna: Maxaynu markale ugu nugulnahay in qaranjab dhaco soddon sano kadib, iyadoo weli dhaawacyadii innagu yaalaan, mase laga baaqsan karaa cabsidaan joogtada ah ee ku geedaaman Jamhuuriyadda Saddexaad.

# DHABIHII ADKAA

Haddaan ku bilaabo, cabsidaan taagan hadda, maaha mid la kowsatay nidaamka dowladeed ee hadda jira, hase'ahaatee, waa mid bar-bar socotay geeddi socodka qaran dhiska Soomaliya, kasoo bilow dhabihii loo soomaray dowladdii saddexaad ayaa ahaa mid aad u qalafsan, waxaa lagu guuldaraystay 15 shirweyne oo dib-u-heshiisiin muddo 10 sano ah (1991-2000), taasoo gudaha iyo dibadda lagu qabtay.

Markii la qaatay tobban sano oo iska dabo wareeg ah, oo kala aamin bax' ah, oo ay Soomaaliland gooni u istaagtay 1991, Puntand-na ay sameysatay maamul u gaar ah 1998, halka ay koonfurta Soomaliyana markaas aysan jirin hannaan maamul oo mideeya. Shirka Carta ee 2000 qabsoomay ayaa lagu yagleelay Jamhuuriyadda Saddexaad ee haatan cagaha adag aan ku taagneyn, waxaana lagu dhisay Axdi Qarameed kumeel-gaar-ah, wuxuuna qeexayey afar tiir oo udub dhexaad u noqonaya dowladda cusub; kow, maamul dimuqraadiyad ku dhisan oo loo marayo doorasho muddeysan, labbo, habka awood qaybsiga ee qabiilka ku saleysan 4.5, saddex, nidaam federaal ah, ugu danbeynna, nidaam baarlamaani ah. Haddaba, markii intaas la isla qaatay ayaa Ogoos 2000 waxaa baarlamaanku u doortay Cabdiqaasim Salaad Xasan madaxweyne, sidaas ayayna dib ugu soo noqotay qaranimadii dhabaha adkaa loo soo maray.

Durbadiiba dowladaas cusbayd waxay la kowsatay culaysyo siyaasadeed iyo taageeradda ay gudaha ka heshay oo yaraa, waxaa laga fursan waayey in la qabto shirweyne kale oo uu garwadeen ka ahaa Urur Goboleedka IGAD, kaasoo natiijadii kasoo baxday dhashay hishiis siyaasadeedkii lagu askumay, Axdiga Federaalka Ku Meel Gaarka ah (TFC)—2004. Xilligii madaxweyne Shariif Shiikh Axmed (2009-2012), ayaa la hirgaliyey Dastuurka Federaalka Ku-meel-gaarka ah, waxaanna halkaas looga baxay xilligii kala guurka.

Isku soo duuboo, waxaa laga soo bilaabo 2004 meesha ka baxay qabqablayaashii joogay caasimadda Muqdisho iyagoo dowladda ku soo biiray intooda badan, sidoo kalena waxaa

soo siyaaday maleeshiyada Al-Shabaab oo laf dhuungashay ku noqotay dowlad-dhiska Soomaaliya ilaa iyo laga soo bilaabo 2006, halka ay Islaamiyiinta qunyar-socodka ahaa ay qeyb ka noqdeen hannaanka dawladnimo 2008, waxaana dhanka kalena, Soomaaliland sii xoojisatay mawqifkeedii ahaa inay ka madax banaantahay Soomaliya, mudadaas ay isbadaladaas waaweyn ku dhaceen qaab dhismeedka dowladnimo ee Soomaliya, waxaana 2012 qeyb ka noqday hannaanka federaalka maamulka Galmudug, dhababahaas dheer oo hadba waayo joogay ayaa soo maray Jamhuuriyadii Saddexaad ee Soomaaliya, oo noqonaysa tan ugu wakhtiga dheer marka loo eego labbadii kale ee ka horeeyey.

## DOWLADNIMO NUGUL

Marka aad eegtid xilliga rubac-qarniga ah ee ay jirtay Jamhuuriyadda Saddexaad iyo sida ay fadhiidka u tahay oo wax horumar ah oo la taaban karo aysan uga samayn dhanka taaba-galinta hay'addo dowladeed oo awood leh oo shaqadooda ay ka madax-banaantahay saamayta siyaasadeed ee marwaliba ku xiran qofka jooga Villa Soomaaliya, waanna meesha ay u dhutinayso dowladnimadu oo u diidan inay soo kabato.

Labo iyo tobankii sano ee ugu danbeeyey waxaa soo maray madaxtinimada Soomaaliya saddex madaxweyne, waxay si jiitan ku jiro u dhisayeen hab-dhaqan dowladeed oo aan weli gaarin heer isku filaanasho ah ama lala barbardhigo karo waddamada dariskeenna ah, waxaana nasiibdarro noqotay, in May 2022 qarka loo saarmay in dagaal sokeeyo dib-uga-qaraxo Muqdisho, kadib markii Madaxweyne Maxamed Cabadilaahl Farmaajo labo sano ku darsaday, hub uruursi iyo qabaa'ilka oo kacay ayay dhalisay, waanna natiijada laga dhaxlo markii aysan jirin awood sharci oo hagaysa damac siyaasiga maroorsanaya awood dowladeed.

Nuglaanta dowladnimada waxaa ubuc u ah qabyada ku jirta Dastuurka Soomaaliya oo 13-kii sano ee uu qabyada yahay, aan wax qorshe ah oo wadar-ogol ah aan la isla qaadan, inta badan foolaadka siyaasada si bareer ah ayay uga talaabsadaan ku dhaqankiisa, waxaana jira qodobo gaaraya 15 oo isdabraya, una baahan in dib u eegis sal balaaran lagu sameeyo, iskudayga uu sameeyey Madaxweyne Xasan Shiikh Maxamuud iyadoo qaar ka mid ah Dowladaha Xubnaha ka ah Dowlada Faderaalka Soomaliya ay meesha ka maqnaayeen, wuxuu ahaa mid loogu yeeri karo "dib-u-qoris Dastuur" aysan ahayn mid la qabyo tirayo, hannaanka loo marayna wuxuu sii kicinayay xasiloonidarada siyaasadeed ee dal ku jirey.

Halista ay leedahay nuglaanta qaranimada Soomaaliya waa mid laga dheehan karo, sida ay tabarta dowladu ay u tahay mid hooseysa, aan la heyn awood ay isku filaan karto dhan dhaqaale, ciiddan, iyo fulinta mashaariic hormarineed. Taasoo ka dhigaysa in go'aannada masiiriga ah ay la qaataan daneeyayaasha arrimaha Soomaaliya.

## ARAGTI CUSUB

Baryhaan waxaa si xoog ah u soo baxayay dood ku aadan in habacsanaanta geeddi-socodka doladnimada iyo fashilka jiraa uu sabab u yahay hannaanka/aragtida Federaalka ah ee dowladu ku dhisantahay, taasoo haldoorka siyaasiyiinta Puntland ay ku soo ceshaan in loo baahanyahay in la qaato hannaan kan "Fedaraalka" ka duwan, maadaama uu noqday mid fadhiid ah oo aan u shaqaynayn sidii lagu heshiiyay.

Xaqiiqada aanu wada qirsannahay waxa weeye, in aragtida siyaasadeed ee asal ahaanteedu cillad ahayn, waxaase micne u yeela ama micne tira heerka uu gaarsiisan yahay ku dhaqankeeda iyo fulinteedu, haddaba, aragtida fedaraalku maaha meesha ay wax-iska-qabsan la' yihiin, oo ay u dhutinayso qaranimada Soomaaliya, balse waxa weeye: Dowladda Federaalka iyo Dowladaha Xubnaha ka ah ma dhaqan gelinayaa mabaadi'da dastuuriga ah ee uu ku dhisanyahay fedaraalku, mise waxaa loo isticmaalayaa dano siyaasadeed oo marka Dowladda Federaalku ay ka dhex aragto danaheeda gaarka ah, sida aanu in badan ka aragnay dowlada u hoggaaminayo Xasan Shiikh Maxamuud.

Doodda ku dhisan in qaab-dismeedka dowladda la baddalo waa mid cuskanaysa in aysan ka jirin Muqdisho hay'addo dowladeed oo is dheeli tiri kara, xooganna, ku dhaqanka sharciga oo hooseeya, isla xisaabtan aan jirin, intaas la'aantood waxay xoojinaysaa in miiska la soo saaro aragtiyo cusub oo xal loo arki karo, taariikhdu-se waxay ina baraysaa, in haddii wadar-ogol aan lagu xallin kala duwanaanta siyaasadeed in markale aanu ku dhici karno halkii shalay lagu kufay oo qaranjab hor leh uu imaan karo.


## XAGEE KU DANBEN!

Jamhuuriyadda Saddexaad ee Soomaaliya waxay wajahaysaa caqabado waawayn oo keeni kara in xasarado siyaasadeed ka qarxaan dalka, waxaana loollanka taagan sii hurinaya Madaxweynaha Soomaaliya Xasan Shiikh oo ku shaqaynaya, istiraatiijiyada "Guulaystaha ayaa qaadanaya wax waliba" isagoo isku-kali-yeelay awoodda fulineed ee dowladda, wuxuuna bedelay dastuurkii lagu heshiiyay, iyo sharcigii doorashada si uu ugu adeego damaciisa gaarka ah, waxaanna ayaandarro ah in Xasan mar labaad loo doortay madaxtinimadda Soomaaliya oo uu leeyahay waayo-aragnimo ku filan oo uu ku badbaadin karo qaranka tabarta yar ee ku tiirsan kaalmada joogtada ah ee Beesha Caalamka, hase ahaate, wuxuu doonayaa in uu u xusulduubto sidii mar saddexaad u noqon lahaa "Madaxweyne" wax waliba oo dhacayana ha dhaceene!

Xaqiiqada dhabta ah ee ay tahay in la weeleeyo waxaa weeye; ma nihin dad kasoo kabtay burburkii taliskii Maxamed Siyaad Barre, xusuusihii laga dhaxlay qaranjabkii oo weli muuqanaya, bulshaduna waxay ku kalsoontahay qabiilka inta ay ku kalsoontahay dowladnimada, mar'alaalle iyo markii la damco in la muquuniyo waxaa la galayaa cabsi hor leh oo keeni karta in dib loogu laabto bartii 91-dii, qaranimadii soo celinteeda loo soo maray dhabihii adkaana ay burburto, waxaanna dhab ah, bur-bur kale hadduu dhaco, in la waayayo dal la dhaho Soomaaliya, oo gobol waliba iskiis u tashan doono, waxaanna tusaale nool u noqonaynaa "Anarchism" bulsho iska nool oo aan la hayn hannaan dowladeed oo shaqeeya bixiyana adeegyada dowladeed.

Si loo soo celiyo rajada Jamhuuriyada Saddexaad oo ay uga badbaadno caqabadaha jira, waa in Dowladda Federaalka ku soo laabataa dhabihii wadashaqaynta oo dastuurka la bedelay joojisaa, iyadoo talada wax ka bedelka ka dhigaysa mid loo dhan yahay, sidoo kale, waxaa daruuri ah in la gaaro heshiis siyaasi ah, oo lagu xallinayo kala duwanaata saamileyda siyaasadeed, iyadoo maamulada Puntland iyo Jubbaland tabashadooda labada dhan ba ah wada haddal lagu xallinayo, markaas ayay soo noqon kartaa rajada Jamhuuriyadda Saddexaad.

**W/Q:** Maxamed Mire



**Xigashada Sawirka:** Reuters

# SHUMACII LA SHIIQIYEY: SHIRKII HORMARINTA GOBOLKA MUDUG

Bashiir Suuleey




Xigashada Sawirka: Dalmar Media

Gobolka Mudug waa mid ka mid ah goobaha ugu dadka badan guud ahaan gayiga Soomaaliyeed. Waxa uuna ku jiraa gobollada dhaca bartamaha Soomaaliya. Gobolku, waxa uu haystaa fursado dhowr ah oo ay ka mid yihiin; meesha uu kuyaalo oo goob istiraatiiji ah, tirada dadkiisa oo badan, iyo kaabayaasha dhaqaalaha oo ay dekedda Garacad ka mid tahay. Iyadoo oo ay fursadahaas jiraan haddana waxa uu gobolku gaar la yahay dib-u-dhac iyo daannooyin daashaday oo uu muddo la daalaadhacayey. Waxaana ka mid ah:

1. Aanooyinka qabiilka: Beelaha gobolka ayaa muddooyinkii u dambeeyey ku jiray is-aanaysi gaaray heerkii ugu sarreeyey. Waxaa la dilay ganacsato, dhallinyaro ayaa la beegsaday, dhakhaatiir lama dayn, aqoon-yahan kale na warkiis daa!
2. Dhibaatada maandooriyaha: Gobolku waxa uu ka mid yahay meelaha ay khamradu faraha ba'an ku hayso. cilmibaaris lagu soo bandhigay shirkii horumarinta gobolka Mudug ayaa lagu sheegay in 9 isku dhac qabiil oo ka dhacay Gaalkacyo saddex ka mid ah ay sababeen cabtooy is laysay.
3. Hormar la'aan: dhanka horumarka; Mudug waxa uu ka mid yahay gobollada ugu hooseeya Puntland. Dhanka kalana si guud warbixin ay daabacday hay'ada Tirakoobka Qaranka ayaa lagu sheegay in gobolka Mudug yahay kan afraad ee ugu nolol liita Soomaaliya oo dhan.

## MAXAA KA DHASHAY DHIBAATOOYINKA KORE?

1. Haldoorkii oo gobolka ka haajiray: in badan oo ka mid ah dadkii wax-soosaarka lahaa ee gobolka ayaa naftooda kala baxsaday iyaga oo raadinaya goobo kale oo ay gabbaad ka dhigtaan.
2. Hoos u dhac dhaqaale: dhaqaalaha gobolka ayaa aad hoos ugu dhacay sannadihii ugu dambeeyey. Inta badan shirkadaha ganacsiga gobolka ayaa khasaaro qarka u saaran. Shirkad walbaana waxa ay si cad kuugu sheegaysaa in ay ku jirto waayeheedii ugu xumaa.
3. Sumcaddii oo dhimatay: magicii iyo maqaamkii gobolka ayaa aad hoos ugu dhacay taas oo loo sababeeyey dhibaatooyinkii uu ku jiray sannadihii ugu dambeeyey.
4. Hab-fikirkii bulshada oo is beddelay: kala fogaanshaha reeraha iyo colaadaha ayaa sabab u noqday in uu meesha ka baxo wadaaggii iyo wax wada lahaanshihii, bulshaduna sii kala fogaato qof walbaana danta reerkiisa ka fekero.

## BILOWGII BARAARUGGA BULSHADA

Bishii shannaad ee sannadkan 2025 ayaa bulshada gobolka oo ay dhallinyaradu hormuud u yihiin bilowday kacdoon ay ku dalbanayaan in wax laga qabto duruufaha deegaanka daashaday. Arrimaha ay codsanayeenna waxaa ugu waaweynaa: dhismaha Jidka Gaalkacyo-Xarfo, biyo-saarka Gaalkacyo, garoonka diyaaradaha oo qarka u saaran in uu xirmo iyo xaaladda amniga oo ay aanada qabiilka ugu horrayso.

Markii ay bulshadu muddo wadday qeylo-dhaantaas weydayna cid u jawaabta, ayaa ay ku baaqeen isu-soo-bax ujeedkiisu ahaa in si guud dareenkaas loo muujiyo.

Markaas ayaa la bilaabay in dacaayado lagu furo dhallinyaradii hormuudka u ahayd baraaruggaas. Qeyb xabsiga ayaa loo taxaabay, kuwo waxaa loogu hanjabay in ay mar xabsiga soo arki doonaan, kuwo kale ayaa inta kaararkooda gacanta la baartay la faafiyey in ay lacago soo qaateen.

Dhammaan isku-dayadaasi ma noqon kuwa hor istaaga hadafkii guud iyo hormuudkii baraarugga oo hammigoodu ahaa hagaajinta iyo u qareemidda danta deegaankooda.

Waxaa xusid mudan in duruufihii deegaanka dowladdu ka jawaabtay jidka Gaalkacyo-Xarfo oo kaliya ayna sheegtay in ay dhisi doonto iyada oo aan weli meel lagu sheegin deeqdii beesha caalamku jidkaas ugu talo-gashay, gaar ahaana mashruuc Bankiga Horumarinta Afrika oo 67-km oo jidkaas ah loogu talogalay in lagu dhiso.

Guuxa ka imaanayey gunta hoose ee gobolka ayaa gaaray gees walba oo dunida guudkeeda ku yaal. Waxaana bilowday abaabul lagu qorshaynayo in la isku xiro dhammaan bulshada gobolka dal iyo dibad-ba. Ugu dambeynna, waxaa la isku raacay ku dhawaaqidda shir loogu wan-qalay: "Shirka Hormarinta Gobolka Mudug".

## MAXAA XIGAY?

Mar kale waa tan dowladdii oo uleheeda iyo udbeheeda wadata. Duqa Degmada Gaalkacyo ayaa noqday masuulkii ugu horreeyey oo si cad u sheega in aan la oggolaan doonin shir aan fasax looga haysan, huteelkii lagu qabtaana uu u aayi doono. Guddoomiyaha gobolka Faysal Sheekh Cali Jifi-jabsade ayaa isna meel walba la istaagay in shirka Xamar laga soo abaabulay, uuna yahay mid Puntland lagu duminayo.

Waxaa soo dhawaaday xilligii shirka, waxaana soo dhoofay: Siyaasiyiin, aqoon-yahan iyo ganacsato waaweyn oo adduunka ka kala yimid. Waxaa xusid mudan in maalinkii imaatinkooda garoonka diyaaradaha laga macnuucay in xitaa taleefoon sawir lagu qaado iska daa wariye muuqaal duubee!

La isu yimid, si loo sii ambaqaado shaqadii shirka, waxaana la soo bandhigay ajande muddo bil ka badan laga shaqaynayey oo ay ugu horreeyeen: Amniga iyo Caddaaladda, Horumarka gobolka, Matalaadda gobolka, iyo Isla xisaabtan. Waxaana qornaa oo diyaarsanaa in shirku u bato: Cilmi-baarisyo iyo dood-cilmiyeedyo la xiriira ajandayaasha kore.

Maxaaba nagu watay "Caddaalad, Matalaad iyo Isla xisaabtan"!

Waxaa magaalada yimid wasiirradii iyo xildhibaannadii gobolka. Waxaana wada fariistay dowladda oo garab ah iyo guddigii shirka, waxa ayna dowladdii soo jeedisay in shirka ajandihiisa iyo hagiddiisa iyada looga dambeeyo. Waase laga biyo diiday. Ugu dambeyn waxaa soo galay odayaal dhaqameed bal si ay arrinta u xalliyaan. Waxa ayna go'aamiyeen in shirka loo magacaabo guddi cusub oo isugu jira: odayaasha dhaqanka, dowladda iyo guddigii hore. Arrintaasu ma noqon mid u cuntanta guddigii muddada dheer shirka soo waday waxa ayna dheheen: "Dowladda iyo odayaashu haddii ay shir qabanayaan horay bay u qaban lahaayeene, shirkaas ama ha la diido ama la oggolaado, annagu se kama shaqayn karno shir hadda kow laga bilaabayo"! Waana la kala kacay!

Marka kale ayaa loo baahday cid isu soo jiidda dowladda iyo guddigii shirka. Waxaana doorkooda qaatay Guddiga hormarinta degmada Gaalkacyo. Dadaal dheer ka dibna waa la is hor fariistay. Waxaana shaqo laga bilaabay anajdihii. In la akhriyo ayaa la gudo-galay. Meel kasta oo lagu arkay "Matalaad, isla xisaabtan, caddaalad, garsoor iyo amni aan aano-qabiil ahayn iyo xitaa eray kasta oo dowlad la xiriira" qalin cas ayaa la mariyey (waa la tirtiray).

Odayaashii hormuudka ka ahaa qaban-qaabada shirku waxa ay qoreen taariikh aysan illaawi doonin, waxa ay joogeen maalmo dhowr ah oo geed dheer iyo mid gaaban loo fuulay sidii gacanta looga dhigi lahaa shir ay muddo soo wadeen. Nin ganacsade aan horay u imaan Gaalkacyo laakiin dareenka bulshadu soo jiiday kana mid ahaa wafdiga yimid ayaan ka qoray hadal nuxurkiisu ahaa: "Dowladnimadiinnu ma saanaa, ma imaadeen meeshaan haddii aan ogahay!" Maalmo kale ayey qaadatay in la isla gaaro in ugu dambeyn la isla oggolaado in shirku dhaco ayada oo la wada socdo dowlad iyo guddiba. Waana sidii dowladdu rabtay!

## MAXAA SOO BAXAY?

Shirkii loogu talo-galay in uu socdo saddex maalmood oo xiriir ah oo dhammaystrin, lagana filayey in lagu soo bandhigo in ka badan 10 daraasadood, iyo 6 dood-cilmiyeed, waxa uu isugu biyo-shubtay maalin iyo bar kaliya. Marka laga reebo hal saac waqti aan dhammayn oo lagu soo banddhigay saddex daraasadood inta kale waxaa socday khudbado sidii Soomaali caadada u ahayd!

Ugu dambeyntiina waxaa soo baxay war-murtiyeed la wada qoray lagana ilaaliyey wax kasta oo ay dowladdu ka didayso laguna koobay mahadcelin, aan shaqaynno, guddi aan qabanno iyo shirku sannad walba ha inoo dhaco.

Reer Gaalkacyood se, waxa ay guul u arkayeen in shir magaalada ka dhaco, dib loogu soo laabto, laguna ballamo in shirku joogto noqdo. "Waa intaas oo looga sii dhawaadaa" ayaa ay isku waraysatay bulshadu.

## GUNAANAD:

Shirkaasu waxa uu daaha ka qaaday sida aysan masuuliyiintii matalaysay dowladda Puntland marna raalli uga ahayn in bulshadu shiri karto iyaga oo aan shirkooda dowladdu hagin, u yeerin waxa la dhahayo, baarin cidda ka qeyb-galaysa, soona saarin waxa soo baxaya!

Waana arrin ka soo horjeedda xorriyadda iyo xaqa dastuurkeennu siinayo bulshada sida ku cad qodobka 14-aad ee dastuurka dowladda Puntland oo ugu yaraan qof kasta xaq u siinaya in uu fikirkiisa dhiiban karo faaf-reeb la'aan.

Arrintaas ayaa niyad-jab weyn ku noqtay dadkii gobolka dantiisa ka shaqayn lahaa dibna ugu soo laaban lahaa si ay maalkooda iyo muruqooda u geliyaan. Haddaba, si arrimahaas looga baaqsado:

1. Dowladdu waa in ay ka jawaabtaa tabashooyinka bulshada waxna laga qabtaa baahiyaha ay ka cabanayaan.
2. Waa in aan dadka laga hor-istaagin xaqa uu dastuurku siiyey loona oggolaado in ay horumarka deegaankooda ka shiri karaan si ay wax uga qabtaan.
3. Waa in masuuliyiinta dowladdu aysan dadka iyo dowladda kala fogayn, dadkana loo tusin in dowladdu tahay mid u dhaqanta sidii dowlad kaligii talis ah, sida ka muuqatay hab-dhaqanka masuuliyintii Gaalkacyo loo soo diray.

**W/Q:** Bashiir Suuleey




**Xigashada Sawirka:** Dalmar Media




**Xigashada Sawirka:** Dalmar Media



**Xigashada Sawirka:** Dalmar Media




**Xigashada Sawirka:** Dalmar Media

# WAA MAXAY RAADKA UU DHISMAHA DOWLAD GOBOLEEDKA WAQOOYI-BARI KU YEELAN DOONO BIDHAANTA JUQURAAFI-SIYAASADDEEDKA SOOMAALIYA?

Cabdiraxmaan Shiikhdoon



Xigashada Sawirka: Halbeeg

Waxaa socda dhismaha dowlad-goboleedka Waqooyi-Bari oo si rasmi ah loogu dhawaaqay 30-kii Luulyo (July) 2025, taas oo noqonaysa dowlad-goboleedkii lixaad ee ka dhalata Soomaaliya. Arrintaasi waxa ay si weyn raad ugu yeelanaysa qaabaynta bidhaan juquraafi-siyaasaddeedka Soomaaliya (geopolitical landscape of Somalia), gaar ahaan Somaliland iyo Puntland. Arrintaas waxaa ka dhalan karta fursado cusub iyo caqabdo, kuwaas oo raad ku yeelanaya gedgadoonka siyaasadda (political dynamics) iyo hardenka awooddaha (political struggle). Gedgadoonka juquraafi-siyaasadeedka Soomaaliya waxa uu ku xirnaandoonaa hogaamiyaasha siyaasadda, kuwaas oo looga baaahan yahay isku dheeli-tirka caqabadaha gudaha ka jira, danta bulshada iyo awoodaha ka baxsan Soomaaliya. Qormadan waxa ay si kooban u falan-qaynaysaa sida isbedellada socda ay wax uga bedeli karaan juquraafi-siyaasadeedka, gedgadoonka siyaasadda iyo hardanka awooddaha ee Soomaaliya.

# JUQURAAFI-SIYAASADDEEDKA

Si kooban, juquraafi-siyaasaddeedku waa aragtiyo sharxaya xiriirka ka dhexeeysa juquraafi dhuleedka iyo awoodda siyaasadda iyo raadka uu juquraafigu ku leeyahay siyaasadda iyo xiriirka caalamiga ah. Furaha juquraafi-siyaasaddeedku waa awoodda siyaasadeed iyo saamaynta dowladda oo ka imanaysa bulshada, dhaqaalaha, khayraadka, iyo tiknoolajiyada. Gedgadoonka siyaasaddu waxa uu ka dhashaa isbedelka ka dhex jira nidaamka siyaasadda iyo fikirka (ideology) fulinta siyaasadda. Tusaale ahaan, markii uu socday dagaalkii Laascaanood, Khaatumo iyo Puntland waxa ay ka mideysnaayeen xoreynta goboladda SSC iyo iska caabinta Somaliland, halka ay Dowladda Federalkuna mawqifkeedu ku koobnaa in ay ku baaqdo xabad joojin aan dheg jalaq loo siin. Khaatumo iyo Soomaliland waxa uu mid kasta, ku eedeeyay Dowladda Federaalka Soomaaliya in ay dagaalka qayb ka tahay. Dhinaca kale, maanta Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa si weyn u taageeraysa dhismaha dowlad goboleedka Waqooyi Bari, halka Somaliland iyo Puntland ay qawadeen dhismaha dowlad goboleedka cusub. Arrinmahaasi, waxa ay muujinayaan sida uu juquraafi-siyaasaddeedku raad ugu leeyahay gedgadoonka awoodda iyo hardenka siyaasadda. Iyada oo gedgadoonka juquraafi-siyaaddeedka ee Geeska Afrika uu ahaa mid aan deganayn, haddana midka ka dhacaya Soomaaliya, waa kii ugu badnaa ee ka dhaca Geeska Afrika, taas oo ay sabab u tahay faragelinta dowladaha shisheeye iyo degnaan la'aanta ka jirta Soomaaliya.

# XAGEE KA BILOWDAY ISBDELKA SIYAASADDA EE DOWLADDA WAQOOYI BARI?

In kasta oo wax qaybsiga kuraasta siyaasadeed aysan marna ka qatanayn dadka ka soo jeeda deegaanada SSC ee wax ka dhistay Puntland, haddana maamulka Puntland si buuxda ugama hawlgelin deegaanada Khaatumo. Ku dhowaad 20-kii sanno ee ugu dambeeyey, maamulka Somaliland ayaa si buuxda gacanta ugu hayey magaalada Laascaanood iyo deegaanada ku teedsan wadada laamiga ah ee isku xirta Burco iyo Garoowe. Taasi, waxa ay keentay in siyaasiyiinta doonaysa xilka madaxweynaha ee Puntland ay ku ololeeyaan xoreynta gobolka Sool, si ay u helaan aqlabiyada 17-ka xubnood ee baarlamaanka ee SSC laga soo doorto. Oraahda caan baxday ee uu ku ololeeyay madaxweyne Cabdiweli Cali Gaas ayaa ahayd: " Laascaanood Faataxo laguma qabsan", taas oo uu la jeeday in Laascaanood dagaal lagu qabsaday oo ay u baahan tahay in dagaal lagu xoreeyo.

Maamullada Somaliland iyo Puntland ayaa mid kasta khariidada bidhaan dhuleedkiisa ugu jirtaa gobollada SSC, iyadoo xubnaha sare ee labada maamul ay ka dhex muuqdaan dad ka soo jeeda gobolada Khaatumo/Maakhir, sida guddoomiyaha baarlamaanka ee Somaliland oo uu inta badan xilkaas soo qabtay qof ka soo jeeda gobollada Khaatumo iyo madaxweyne ku-xigeenka iyo guddoomiyaha baarlamaanka Puntland oo uu markasta qabanayey qof ka soo jeeda gobollada Khaatumo/Maakhir, sida ay u kala horreeyaan. Arrimahaasi waa kuwo ilaa iyo hadda ka muuqda qaab-dhismeedka maamullada Puntland iyo Somaliland, in kasta oo ay haatan aad u yaraatay awoodda siyaasiyiinta ka soo jeeda gobollada Khaatumo ee ku jira maamullada Somaliland iyo Puntland, taas oo ay sabab u tahay hano qaadkii

maamulka Khaatumo iyo isbedelka juquraafi-siyaasaddeedka ka dhacay deegaanada Khaatumo sannadkii 2023-kii, kuwaas oo si aan qarsoonayn u muujiyey himilada iyo hanka dadweynaha SSC. Taas oo u rumowday markii 30 Luulyo (July) 2025, si rasmi ah loogu dhawaaqday dhismaha dowlad goboleedka Waqooyi bari.

Hardenka siyaasadda ee ka jiray gobolada SSC waxaa ka dhashay gedgadoonka siyaasadda iyo hardenka awoodda, kuwaas oo ay ugu weyn yihiin:(i) curashadii dhaqdhaqaaqii SSC, ka dibna noqday Khaatumo, (ii) erey-bixinta dhul lagu maransan yahay (disputed area), (iii) siyaasiyiin labo-gar daaq ah oo fursadda siyaasaddu ay hogaamiso (political opportunist), (iv) degenaansho la'aanta siyaasadda iyo xasillooni darro muddo dheer ka jirtay gobolka, taas oo ay keentay in marar badan ay gobolka ka dhacaan dagaallo kharaar.

Arrinta ku saabsan maamulka Khaatumo waxa ay ahayd mid soo jiitamaysay mudo dheer, hase yeeshee waxa ay si toos ah u soo if baxady booqashadii Ra'iisulwasaaraha Dowladda Federaalka Soomaaliya Xamse Cabdi Bare ee magaalada Laascaanood ee 14-kii bishii April 2025, oo ay ka dhalatay in la siidaayo 25 maxbuus oo ka tirsanaa ciidamada Somaliland ee lagu soo qabtay dagaalkii Laascaanood iyo ku dhawaaqistii aqoonsiga Khaatumo. Dhacdadaasi waxay keentay in Somaliland iyo Puntland ay si toos ah isku dhaafsadaan maxaabiis lagu kala qabsaday dagaalkii Laascaanood. Dhanka kale, waxa bilowday dagaal saxaafadeed u dhexeeya Khaatumo iyo Puntland iyo doodo siyaasadeed oo taageero u muujinaya Somaliland, kuwaas oo qaarkood ay baarlamaanka Puntland su'aalo ka fureen.

Dhinaca kale, gobolka Sanaag waxa uu ahaa mid xagga siyaasadda aad u degan, ma jirin iska horimaadyo hubaysan oo ka dhacay gobolkaas. Dhammaan degmooyinka gobolada Sanaag iyo Haylaan waxaa ka dhacay doorashooyinkii golaha deegaanka ee Puntland. Siyaasadda Somaliland ee gobolladaas waxa ay ku koobneyd dad ka soo jeeda goboladaas oo mansab siyaasaddeed ka hela Somaliland, iyo mashaariic aan badnayn oo laga fuliyo gobolladaas. Taas waxaa dheer in dugsiyo tiro yar ay galaan imtixaanka ay qaaddo Somaliland. Goballada Sanaag iyo Haylaan, waxa ay kaga duwan yihiin Khaatumo waa isimadda dhaqanka oo aan isku aragti ka ahayn maamulka Waqooyi Bari, iyo juqaafi ahaan dhulka ay degaan reer Maakhir oo ka tirsan gobalka Bari.

Magaca Maakhir waxa uu ahaa mid ay hadalhayntiisu muddo soo jirtay, laakiin ma jirin dhaqdhaqaaq hubeysan, maadaama uusan jirin maamul xoog ku haysta deegaanada Maakhir oo qori looga horyimaado, marka laga reebo magaalada Ceeri-gaabo oo si nabad ah lagu wada degenaan, laakiin ay Somaliland maamulaysay. Qaar ka mid ah siyaasiyiinta reer Maakhir oo saluugay wax qaybisga maamulka Puntland oo kaashanaya Dowladda Federaalka ayaa calan u taagay magaca Maakhir. Intaas ka hor waxaa jiray doodo ka socday gobolka Sanaag oo ku saabsanaa horumarinta iyo himilada gobollada Sanaag iyo Haylaan, kuwaas oo inta badan uu garwadeen u ahaa mac-hadka Hadaf. Isla jaanqaadka Khaatumo iyo Maakhir waxaa fududeeyey madaxweyne Cabdulqaadir Firdhiye oo ka dhex arkay fursad dib-u-doorasho in wax lala dhisto Maakhir. Taas waxaa sii xoojiyey, dhammaan siyaasiyiinta laga doortay Puntland sannadkii 2022, oo aan xiriir wanaasgsan la lahayn maamulka Puntland.

# RAAD SIYAASADDEEDKA DOWLADDA GOBOLEEDKA WAQOOYI BARI

Waxaa la odorosayaa in dhismaha dowlad goboleedka Waqooyi-Bari uu keenayo isbedel siyaasaddeed, mid dhaqaale iyo mid nabadgelyo oo raad ku yeesha siyaasadda gudaha ee Soomaaliya iyo siyaasadda dibadda, gaar ahaan dalalka danaha ka leh Soomaaliya.

# PUNTLAND

Puntland waxa ay ku guulaysatay kasbashada maamulkii SSC xilligii lagu jiray dagaalka gobolka Sool, oo ay taageero naf iyo maal ah ka gaysatay, hase yeeshee waxa ay ku guul dareysatay dhinicii siyaasadda markii uu maamulka SSC u gudbay dhisidda maamulka Khaatumo, sida uu qiray madaxweyne ku-xigeenka Puntland oo dhowaan hadal ka jeediyey tuulada Hadhwanaag ee Gobolka Sool iyo sida ay qireen siyaasiyiin badan oo reer Puntland ah. Waxa jira tusaale loo soo qaato hogaaminta ku salaysan xaaladda (Situational

Leadership), sida in ra'iisulwasaarihii dowladda Ingiriiska ee xilligii dagaalkii labaad ee aduunka uu ku guulaystay hogaaminta dagaalka, hase yeeshee waxa uu ku guuldaraystay hogaaminta dalka dagaalkii ka dib, isaga oo wax ka qaban waayey dhaqaale xumo baahsan oo jirtay xilligaas. Arrintaasi waa mid hadda ku dhacday Puntland.

Khaatumo waxa ay magacowday guddi ka shaqeeya wada hadal dhexmara maamulka Khaatumo iyo Punltand, sidoo kale waxa uu maamulka Khaatumo ku marti-qaaday maamulka Puntland xafladii Gooja-cade, hase yeeshee lagama faa'iidaysan fursadahaas oo dhan. Qoraal ay dhowaan soo saartay wasaaradda arrimaha gudaha ee Puntland oo ku saabsanaa in ay SSC ay weli qayb ka tahay Puntland, inta si sharci ah loo kala baxayo ayaa cirka ku laashay aragtida ay qabeen siyaasiyiin iyo waxgarada badan oo ee ku aadanayd arrinta Maakhir. Dhinaca kale, siyaasiyiinta ka soo jeedada gobolada Maakhir iyo SSC ee ku jira maamulka dowladda Puntland ayaa ka hor yimid ku dhawaaqistii maamul goboleedka Waqooyi Bari. Dhinaca kale, dad badan oo reer Puntland ah ayaa soo dhoweeyey dhismaha maamulka Waqooyi Bari, kuwaas oo uu ugu horeeyo Cumar Cabdirashiid Cali, Cabdiweli Cali Gaas iyo siyaasiyiinta mucaaradka ah ee Puntland.

Dhacdadii ka dhacday degmada Dhahar waxa ay ahayd ayaandaro siyaasadeed, taasoo ka dhalatay is maandhaafka siyaasadeed. Magaalooyinka Badhan iyo Ceel-buh ayaa ka baaqsaday colaad ay labo ciidan isku hardiyaan. Dowladda Puntland ayaa u dirtay gobollada Sanaag iyo Haylaan wasiiro iyo madax kale si ay wax uga bedesho guuxa gobollada Sanaag iyo Haylaan. Meesha ugu badan ee khilaafka siyaasaddu uu raadka ku yeelanayo ayaa noqonaysa gobollada Sanaag iyo Haylaan, marka magacyada dad ka soo jeeda gobolladaas ay ka muuqdaan saddex maamul ee Waqooyi-Bari, Puntland iyo Somaliland. Sidoo kale, waxa jira warar sheegaya ciidamo ay Dowladda Federaalka Soomaaliya, ay ka qortay gobolka Sanaag/Haylaan, kuwaas oo noqon kara awood ka qayb-qaadata hardenka siyaasadda.

Dhinaca kale, waxa jiri kara fursado badan oo ay ka wada faa'iideysan karaan Puntland iyo Waqooyi-Bari, sida dhaqaalaha, nabad-gelyada, isku xirnaanta bulshada iyo caasimadaha uu ifkoodu isku baxayo. Waa arrin aan dahsoonay in xirnaanta wadada isku xirta Laascaanood iyo Burco ay ka qayb qaadatay koboca dhaqaale ee Puntland. Waxaase jira warar sheegaya in Puntland doonayso in la furo wadada isku xirta Laascaanood iyo Burco, taas oo aan la garan danta dhaqaale ee ugu jirta Puntland. Isimada oo inta badan xalliya khilaafka siyaasadeed iyo bulsho ee ka jira deegaanada Puntland iyo Waqooyi Bari, sida isimadii SSC oo qayb-lixaad ka qaatay xallinta khilaafkii doorashada ee Puntland iyo isimada Puntland oo ka qayb ka qaatay xallinta khilaaf beeleedyo ka jirtay Dharkeyn-geeye, Taleex iyo nabadeyntii dhacdadii dooxada Dureera ee gobolka Sanaag ayaa ah arrimo muujinaya isku xirnaanta bulsho, taas oo xoojin karta wada shaqaynta labada maamul. Fursadaha jira ayaa ka xoog badan caqabada dhici kara, haddii maamulka Puntland iyo Waqooyi-Bari u guntadaan abuurista deganaan siyaasadeed oo xasillooni keeni karta.

## SOMALILAND

Somaliland waxa ay lumisay gobol muhiim u ahaa doodeeda siyaasadeed ee ay ku doonayso in ay ka go'do Soomaaliya. Dhinaca kale, arrintaas waxa ay hakisay wada hadalkii siyaasaddeed ee Soomaaliya iyo Somaliland oo ay garwadeenka ka ahaayeen dalal shisheeye. In kasta oo aysan wada-hadalladaasi aysan weli ka dhalan natiijo la taaban karo, haddana waxa ay ahaayeen wado ay labada dhinac ku wada hadli karaan. Arrin taasi ka duwan waa dagaal saxaafadeedka abuurmay ee Somaliland ku qaaday Dowladda Federaalka Soomaaliya. Dagaaladii ka dhacay gobolka Sool, ayaa weli raad taban ku leh nabad-gelyada Somaliland, taas oo keentay in ay abuurmaan maleeshiyo beelood oo aan horey uga jiran Somaliland, iyo colaado si fudud u dhici kara. Jabkii ku dhacay ciidamada Somaliland ayaa noqday nabar aysan ka soo kaban karin Somaliland, gaar ahaan maxaabiista tirada badan ee ay qabteen ciidamada SSC, kuwaas oo ay ku jiraan saraakiil sare oo ka tirsanaa ciidamada Somaliland.

Dhinaca dhaqaalaha, dagaalkii laascaanood waxa uu Somaliland ku keenay hoos u dhac dhaqaale oo baaxad weyn leh, taas oo uu sabab u ahaa dhaqaalihii ku baxayey dagaalka iyo dhaqdhaqaaqii ganacsiga ee Somaliland la lahayd Sool, Puntland iyo gobolada kale ee Soomaaliya oo gebi ahaanba xirmay. Sida uu sheegay, wasiirkii

hore ee Maaliyada ee Somaliland Sacad Cali Shire, xilligii uu socday dagaalka gobolka Sool, Somaliland waxa ay sannad soo hormarsatay saamigii ay ka qaadan jirtay dekadda Berbera ee ay maamusho shirakada DP World. Sidoo kale, waxa jira canshuur la kordhiyey iyo kuwo cusub oo qaadistooda la soo siyaadiyey, taas oo aan marna kabi karin dhaqaalaha ay Somaliland ku wayday colaadii gobolada SSC.

Somaliland oo uusan weli ka go'in damacadeeda SSC ayaa magacowday guddiga nabadaynta Somaliland, kaas oo ujeeddada ugu weyn ee loo aasaasay ay tahay sidii ay wadahadal ula yeelan lahaayeen SSC. Cabdiqaadir Jirde oo ah siyaasi ruug cadaa ah ayaa guddigaas looga dhigay guddoomiye. Guddiga ayaa qaar ka mid ah odayaasha dhaqanka ee dowlad deegaanka Soomaalida ee Itoobiya u igmaday in ay egro ka noqdaan nabadeyn dhexmarta Somaliland iyo SSC. Guddiga oo garwaaqsaday dhibaatada dhaqaale, nabadgelyo iyo siyaasadeed ee ka dhalatay dagaalkii SSC ayaa si shuruud la'aan ah ku raadinaya wadahadal ay la yeeshaan SSC/Waqooyi Bari. Sida ay wararku sheegayaan, SSC waxa ay u sheegtay odayaashii garwadeenka ka ahaa in wadahadalka Somaliland ula hadli karaan sidii labo maamul oo keliya. Taas oo ay ogolaatay Somaliland, oo codsatay in uu wadahadalku ka dhaco dalka Itoobiya oo ah meesha ay si fudud ugu wada kulmi karaan labada maamul, madaama odayaal ka soo jeeda dowlad deegaanka Soomaalida ay garwadeen ka yihiin wadahadaladaan.

Fursadaha ay Somaliland ka heshay dhismaha dowlad goboleedka ayaa aad u yar, marka la barbardhido dhibaatooyinka ay kala kulmi karto. Waxa la sheegi karo waxa jira isdhaafsigii maxaamiibta ee Somaliland iyo Puntland, wada-hadalo dhowaan looga dhawaaqay Ceerigaabo, oo aan si buuxda u hirgeli karin haddii uu ka maqan yahay maamulka Waqooyi Bari iyo is fahan siyaasdeed oo aan cadeyn oo dhex mari kara Puntland iyo Somaliland.

## DOWLADDA FADERAALKA

Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa heshey fursad ay kaga hor tegi karto dooda Somaliland ee goosashada goboladii Waqooyiga Soomaaliya. General Galaal ayaa qoraal uu qoray bartamihii 90-kii ku tilmaamay in gobolka Sool yahay cumaacunta isku xirta Koofurta iyo Waqooyiga Soomaaliya. Taas oo uu ula jeeday muhiimada uu gobolka Sool u leeyahay midnimada Soomaaliya. Dhinaca kale, arrintaas ayaa caqabad ku ah wada hadalkii Soomaaliya iyo Somaliland. Ra'iisulwasaaraha Soomaaliya ayaa helay qodob uu ku sunto taariikhda waxqabadkiisa, ka dib safarkii uu ku tegay Laascaanood iyo dhismaha dowlad goboleedka Waqooyi Bari. Runtii taageerada dhaqaale ee ay Dowladda Federaalku ku bixisay dhismaha dowlad goboleedka Waqooyi Bari ayaa aad iyo aad uga yar inta laga filayey. Hase yeeshee, Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa farsamo ahaan u riixaysa dhismaha dowlad goboleedka Waqooyi Bari.

In kasta oo aan weli la gaarin, haddana waxaa la saadaalinayaa in ay Dowladda Federaalka Soomaaliya ay raad ku yeelan doonto doorashada madaxtinimada ee dowlad goboleedka Waqooyi-Bari. Sidoo kale, musharixiinta u tartamaya jagada madaxtinimada Soomaaliya ayaa kala taageersan siyaasiyiinta ugu cad cad ee tartanka madaxweynaha maamulka Waqooyi Bari. Xulista xildhibaanada ee sannadka 2026, ayaa lagu tilmaamay in ay tahay meelaha uu ka dhalanayo hardanka siyaasada iyo awoodaha ee doorashada soo socota ee Dowladda Federaalka Soomaaliya. Dhinaca kale, waxa hoos u dhacay dooda ku saabsan Somaliland oo ka jirtay hay'adaha Dowladda Federaalka dhexdooda, madaama Waqqoyi-Bari laga soo doortay mid ka mid ah sideeda qof ee ugu sareeya Dowladda Federaalka Soomaaliya.

## DALALKA DIBADA

Waa arrin muuqata in ay dalal badan oo dunida ka mid ahi ay dano ka leeyihiin Soomaaliya, taas oo ay sabab u tahay muhiimada bidhaanta juqraafi-siyaasadeedka Soomaaliya iyo tabar darrida dowladda Soomaaliya oo aysan siyaasaddeedu saldhigan. Sarkaal Sare oo ka tirasan Dowladda Federalka oo magaciisa qariyey ayaa sheegay in aysan dowladda Ingiriisku la talin Soomaaliya ee ay u yeeriso waxa ay doonayso, sida lagu qoray bogga Daljir Radio. Isla qoraalkaas, waxaa lagu sheegay, in ay Soomaaliya ku hoos jirto gumaysigii Ingiriiska iyo dalka Ingiriisku sida uu gacan ugu leeyahay arrimaha nabadgelyada, dastuurka iyo qorshaynta dhaqaalaha ee Somaliland. Sidoo kale, waxa lagu tilmaamaa dowladda Ingiirsku inay gacanta ku hayso nidaamka taageerada caalamiga iyo amniga ee Soomaaliya. Dowladda Ingriisku, waxa ay dareen xoogan ka muujisay booqashadii ra'iisulwasaaraha

Soomaaliya ee Laascaanood iyo dhismaha dowladda Waqooyi Bari, taas oo ay u aragtay in ay ka horimanayso danaha ay ka leedahay Somaliland. Ilaa hadda shirka dhismaha dowlad goboleedka Waqooyi Bari ma helin taageero caalami ah, halkii ay horey dhismaha dowlad goboleedyada Galmudug, Koonfur-Galbeed iyo Hirshabeele u heleen dhaqaale farabadan oo ka yimi hay'adaha caalamiga ah.

Dowladda Imaaraadka Carabta oo ka mid ah dowladaha raadka siyaasadda ku leh Soomaliya, ayaa Soomaaliya ka soo gashay dhinacyo badan sida dhaqaalaha (maalgashiga dekadaha Berbera iyo Boosaaso) iyo dhinaca milateriga oo mushahaar siiso ciidamo badan. Dhinaca kale, waxaa uu Imaaraadku kaga duwan yahay dalalka shisheeye, in uu si toos ah ula macaamilo maamulada ka jira Soomaaliya iyo Dowladda Federaalka Soomaaliya oo intooda badani aanay heshiis wada ahayn. Arrintaas waxa ay  dhalisay su'aal ku saabsan sida Imaaraadku daacad uga yahay taageerida Soomaaliya. Imaaraadka ayaa doonaya in uu Soomaaliya ku saameeyo siyaasaddiisa ku salaysam waxa loogu yeeray Hayb-Soocda Casriga ah ee Carabta iyo Awooda Odoroska Dhaqaalaha (Modern Arab Identity and  Ecenomic Power Projection). Imaaraadka oo xiriir la leh labada maamul ee Puntland iyo Somaliland ayaan soo dhoweyneyn dowlad goboleedka Waqooyi Bari sida ay sheegeen diblumaasiyiin Soomaaliyeed. Sidoo kale waxa ay qaarkood sheegayaan in Imaaraadku wado ififaalaha heshiiska dhexmara Somaliland iyo Puntland. Dhinaca kale, dad badan ayaa aaminsan in Imaaraadku ka dambeeyey arrintii muranka badan dhalisay ee heshiiskii Somaliland iyo Itoobiya.

Dowladaha Turkiga iyo Qadar oo ka mid ah dowladaha raadka siyaasaddeeda ku leh Soomaaliya, ayaa inta badan  taageera Dowladda Federaalka ah oo aan la macaamilin maamul goboleedyada. Sidaas darteed,  taageerada Qadar iyo Turkiga waa arrin aan si toos ah u muuqan karin xilligan, marka laga hadlaayo tageerada dowlad goboleedyada. Qadar iyo Turkigu waxa ay aad u taageeraan Dowladda Federalka ah, gaar ahaan Turkigu waxa uu maamulaa dekada iyo garoonka diyaaradaha ee Muqdisho, sidoo kalena waxa uu Muqdisho ku leeyahay saldhig ciidan. Labada dowladood waxa ay tartan kula jiraan Imaaradka Carabta. Arrintaasi waxa ay sababtay in uu Imaaraadku yareeyo taageeradii uu siin jiray ciidamada Dowladda Federaalka Soomaaliya.

Dhinaca kale, waxa jira warar sheegaya in ay dowladda Shiinuhu ay taageerayso dowlad goboleedka Waqooyi Bari, taas oo ay uga jawaabayso xiriirka u dhexeeya Somaliland iyo Taiwan (Teywan). Warar hordhac ah ayaa tilamaaya in ay suurogal tahay in Shiinuhu waxa ka qabto kaabayaasha dhaqaalaha sida wadooyinka Laascaanood iyo garoonka diyaradaha ee laascaanood. Taasi waxa ay keeni karaysaa horumar ay gaarto dowladda Waqooyi Bari, mar haddii ay yeelato garoon diyaaradeed oo casri ah. Dhinaca kale, arrintaasi waxa ay keeni kartaa in ay ka caraysiiso dowladaha reer galbeedka ee aadka u daneeya shidaalka iyo macdanta Soomaaliya ku jirta, gaar ahaan ceelka Holhol oo si weyn isha loogu hayo.

# GUNAANUD

Ugu dambayntii, isbedelada socdaa waa mid leh fursado siyaasadeed iyo dhaqaale. Sidoo kale,  waa mid yeelan kara caqabado keeni kara xasilooni daro iyo deganaansho la'aan. Si looga faa'iidaysto fursada ka dhalan kara dhismaha dowlad goboleedka Waqooyi Bari, loogana hortago wax kasta oo caqabad ah, waa in dhammaan isku aragti laga noqdo isbedelka siyaasaddeed iyo hardenka awoodaha ee socda oo ay lug ku yeelan karaan dad ka baxsan maamulada Waqooyi Bari iyo Puntland. Caqligu waa in uu ku fekeraa sidii mushkilada jirta loogu bedeli lahaa fursad ee aan loo fekerin sidii caqabadaha jira loogu bedeli lahaa mushkilad aan cidna  caano ka maalin. Waxa qoraalkan ku soo gunaanadayaa tuducyo ka mid ah gabay uu tiriyey Abwaan Gaariye:

"

*Ciyaartuna gebaggebiyo*
*Waxay joogtaa gamtii*
*Halkay ku gudhaysay talo.*
*Gefkana xeer baa ka yaal;*
*Ninkii ku kacaa xad-gudub*
*Wuxuu gelayaa off-side,*
*Allow garansii nin moog!*

"

**W/Q:** Cabdiraxmaan Shiikhdoon



Xigashada Sawirka: UNSOM

# WAXBARASHADA SARE IYO HOGGAAMINTA

## DIB-U-HABEYNTA JAAMACADAHA IYO SOO SAARIDDA HOGGAAMIYEYAASHA MUSTAQBALKA

Dr. Maxamuud C/Raxmaan Maxamuud

# HORDHAC

Hoolasha iyo fasalada jaamacadaha dhallinyaradu waxay si xiiso leh uga doodaan isbedelka siyaasada, dhaqaalaha iyo waxsoosaarka aqooneed ee waddanka. Codkoodu waa mid firfircoon aadna u dheer, fikradahoodu waa cusub yihiin, rajadooduna waa mid fog.

Su'aasha mugta wayn ee u baahan jawaabta ayaa ah: Shahaadooyinkooda iyo waxbarashada jaamacadeed ee ay ku bixiyeen waqtiga dheer, ma noqon doonaan kuwa albaabbada u fura in ay qayb wax ku ool ah ka noqdaan isbedel aqooneed, dhaqaale iyo siyaasadeed, mise waa kuwa ku abuura rajo beel iyo niyad jab baahsan?

Su'aashaani waxay tooshka ku ifinaysaa dhibaatada qarsoon ee haysata waxbarashada sare ee Soomaaliya. Sanad kasta, kumannaan arday ah ayaa ka soo qalin jabiya jaamacado ku kala yaal daafaha dalka. Dhammaan ardadaasi waa kuwo shakhsiayad/qof ahaan ahaan rajo leh, karti iyo dadnimo leh, kuna haminaaya inay noqdaan hogaamiyeyaasha berri. Waxa aad u badan ardada qaar gala suuqa shaqada oo aan kalsooni ku qabin aqoontooda, xirafadahooda una diyaarsanayn in ay la falgalaan suuqa shaqada. Shaqo-bixiyaasha (Employers) kalsooni kuma qabaan xirfaddooda (Skills), aqoontooda (Subject), iyo kartidooda. Haddii Soomaaliya ay rabto cudud waxsoosaar ku hubaysan aqoon iyo harti, haddii aan rabno in aan helno hoggaamiyeyaal dhab ah oo mustaqbal leh, waa in si dhab ah aan uga hawlgalnaa dib-u-habeynta waxbarashada sare maanta, oo aan la sugin berri. Ogow, hoggaamintu ma ahan in qofku xafiis ama meel madax ka noqdo. Hoggaamintu waa in qofku leeyahay saamayn dhab ah oo bulshada iyo mustaqbalka waddanka lagu yeesho raad la taaban karo dhinac kasta.

# HOGGAAMIN LA'AANTA IYO HOOLASHA JAAMACADAHA

Caqabadda ugu wayn ee ina hortaal ama aan wajahayno mustaqbalka dhow ama fog ma aha oo kaliya dib u dhiska kaabeyaasha dhaqaalaha, ama xasilinta amniga. Caqabada ugu wayn ee ina haysataa waa firaaqa hogaamineed oo ka jirta heer walba ee bulshada, laga bilaabo maamulka dowladaha hoose, ilaa dowladda dhexe, ganacsiga, waxbarashada, iyo bulshada rayidka ah.

Mashaakilka maanta ka muuqda nidaamka dowladnimada sida musuqmaasuqa, adeegga dadweynaha oo liita, qabyaaladda siyaasadeed, iyo la'aanta isla xisaabtanka, dhamaantood waa cillado ka dhashay khalad ballaaran oo ah dhanka hoggaaminta. Hoggaaminta suuban waxay ka bilaabataa aqoon, anshax, iyo fikrad furan, kuwaas oo lagu barbaarin karo oo keliya gudaha mu'asasaadka waxbarashada, gaar ahaan waxbarashada sare (jaamacadaha).

Si kastaba ha ahaatee, inkastoo jaamacadaha Soomaaliyeed ay tiro ahaan aad kor ugu kacaeen 20-kii sano ee u dambaysay, tayadoodu waa liidataa, lama xakameeyo (unregulated), lamana saanqaadaan hiigsiyada heer qaran. Hoggaamin la'aanta dhabta ah waxay ka bilaabataa hoolka iyo fasalada jaamacadaha iyo goobaha waxbarashada inta aysan u gudbin bulshada iyo hay'adaha dowladda.

# BALLAN KA BAX: MAXAA KA KHALDAN WAXBARASHADA SARE?

Tan iyo burburkii dowladda dhexe sanadkii 1991, waxbarashada sare ee Soomaaliya waxaa dib u bilaabay dadaallo gaar ah, badankoodana ay hirgeliyeen dad rayid ah oo si gaar ah isu xilqaamay iyo ururro gaar loo leeyahay. Inkastoo arrintaasi ay muujinayso hal-abuurnimo bulsho, haddana waxay sidoo kale dhalisay ama waddada u xaartay nidaam jaamacadeed oo aan nidaamsanayn, ama aan lahayn tayadii waxbarashada sare ee

lagu naaloonayey. Shaki ma leh in jaamacadaha qaarkood bixiyaan waxbarasho soo saartay dad leh karti, qayb lixaadna ka qaatay dib u dhiska waddanka una baahan in la bogaadiyo. Haddana waxaa aad u badan kuwa kale oo la il daran tayo iyo hoggaan xumo aad u baahsan.

Caqabadaha ugu waaweyn ee horyaal waxbarashada sare waxaa ka mid ah:

- La'aanta nidaam tayo sugid iyo aqoonsi jaamacadeed: Jaamacado badan waxay ku shaqeeyaan iyadoo aanay jirin hay'ad rasmi ah oo hubisa tayada manhajka, macallimiinta, ama natiijada ardayda.
- Kaabeyaasha waxbarasho oo liita iyo tababar la'aanta macallimiinta: Qalab la'aan, maqal iyo muuqaal xumo, kutub la'aan, xilli macallimiin badan ay casharro badan isku mar dhigaan ama aysan lahayn aqoon iyo khibrad durugsan oo ku habboon mowduucyada ay dhigayaan.
- Xiriir la'aanta suuqa shaqada: Shahaadooyin badan kuma habboona baahida suuqyada shaqo ee dhabta ah, gaar ahaan dhanka caafimaadka, tiknoolojiyadda, injineernimada, iyo maamulka ganacsiga.
- Maamul xumo iyo anshax la'aan: Jaamacado badan waxay u shaqeeyaan si ganacsi uun ah, halkii ay ka ahaan lahaayeen xarumo aqoon iyo hanuun. Hab-raacyada ardayda lagu qaato, lagu qiimeeyo, ama lagu qalinjabiyo ayaa mararka qaar aan lahayn daahfurnaan iyo isla xisaabtan.

Muuqaalkaas xaaladda waxbarashada sare ee waddanka waa mid qof kasta murugo gelinaysa xilli aynu ugu baahi badan nahay in la helo maskax furan, aqoon la isku hubo iyo karti qofeed oo dib u dhista burbur socday muddo ka badan 30 sano. Waddanku wuxuu u baahan yahay injineerro, dhakhaatiir, macallimiin, iyo siyaasiyiin hoggaamin kara isbeddel dhab ah, dib u qaabayna ku samayn kara mustaqbalka jiilka soo socda. Su'aasha muhiimka ah waa: jaamacadaheennu ma soo saari karaan hoggaamiyeyaasha aan u baahanahay? Muxuu ahaa ujeedooyinka loo yagleelay waxbarashada sare iyo jaamacadaha? Meeday ballantii ahayd in la soo saaro jiil cusub oo ku qalabaysan aqoon iyo karti horseedi karta isbedel wax ku ool ah? Yaa ballanta ka baxay?

# HIMILO CUSUB: JAAMACADAHA IYO CARBINTA HOGAAMINTA

Si loola dagaallamo jahwareerka jira, loona beddelo sawirka aan qurxoonayn ee hadda jira, waa in dib loo qaabeeyaa jaamacadaha iyo guud ahaan waxbarashada sare si ay u noqdaan xarumo lagu dhiso, laguna carbiyo hogaamiyeyaal (Leadership Laboratories) leh karti, mas'uuliyad, aqoon, qiyam diineed/bulsho iyo aragti fog.

Si loo suurtageliyo ujeedkaan waxaan u baahanahay in wax laga qabto saddex arrimood:

1. **Aqoonsiga iyo Hubinta Tayada (Quality Assurance and Accreditation Reform)**

Guddiyada Sare ee Waxbarashada (Higher Education Committes) ee heer Qaran iyo heer Dowladaha Xubnaha ka ah Federal-ka waa in la siiyo awood buuxda, mid sharciyeed iyo mid dhaqaale madax banaan, si ay u sameeyaan kormeero wax ku ool ah iyo qiimeeyno, tayeyn kara jaamacadaha. Waxaa loo baahan yahay in la dejiyo halbeegyo la isku raacsan yahay oo ku saabsan:

- Aqoonta iyo heerka macallimiinta
- Hubinta tayada manhajka iyo maadooyinka la dhigayo
- La jaanqaadidda manhajka iyo baahida suuqyada shaqada
- Natiijooyinka la rabo in ardaydu gaaraan
- Kaalinta cilmi-baarista iyo adeega bulshada
- La shaqeynta ururrada jaamacadaha caalamiga ah iyo kuwa gobolka sida East African Qualifications Framework

Haddii lagu guulaysto in la hirgeliyo ama horumar la taaban karo laga gaaro qodobbada kor ku xusan ee khuseeya hubinta tayada iyo aqoonsiga waxbarashada sare waxay xoojin kartaa kalsoonida gudaha iyo dibedda, waxayna soo saari karaan hoggaamiyaashii loo baahnaa.

2. **Maalgashiga Macallimiinta iyo Manhajka Waxbarashada (Investing in Faculty & Curriculum)**

Si kor loogu qaado tayada iyo kartida waxbarashada sare iyo waxsoosaarka jaamacadaha, waa in si istiraatiiji ah loogu maalgeliyo barnaamijta soo socda:

- Barnaamijyada sare ee lagu tababarayo macallimiinta heer jaamacadeed iyo iskaashi dhab ah oo lala yeesho hay'adaha aqoonyahannada dibedda (Professional Bodies)

- Manhaj casri ah oo diiradda saara fikirka toolmoon (Critical Thinking), xirfadaha xallinta dhibaatooyinka (Problem-Solving), anshaxa iyo qiyamka (Ethics and Values), cilmi-baarista (Research), iyo hoggaaminta (Leadership)

- Ku darista waxbarashada muwaadinnimada (Civil Education and Life Skills), hal-abuurnimada, iyo ganacsiga (Creativity, Entrepreneurship)

- Jiilka cusub waa in lagu qalabeeyaa aqoon iyo karti la jaanqaadi karta isbeddelka aqooneed, tiknoolayajiyadeed, iyo horumarinta bulshada.

**3. Iskaashiga Jaamacadaha iyo Ganacsiyada (Business-Universities Collaboration)**

Waxaa muhiim ah in la abuuro lana kobciyo xiriirka jaamacadaha iyo suuqa shaqada, isla markaasna la dhiirigeliyo isku xirnaantooda iyo wadashaqayntooda joogtada ah si jaamacaduhu u soo saaraan cudud-waxsoosaar (Labour force) ku qalabaysan aqoontii iyo karti looga baahnaa suuqa shaqada iyo hal-abuurka ganacsiyo cusub. Isku xirnaantaani waxay lagu suurtagelin in la fuliyo arrimaha soo socda:

- Fulinta barnaamijyo tababar shaqo iyo xirfadeed (internship and apprenticeship programs) ardayda lagu baro xirfado iyo aqoon toos ah ee ay u baahan tahay suuqa shaqada. Waa in ardaygu inta uusan dhammayn jaamacadda loo suurta geliyo in lagu meeleeyo goobaha shaqada la xiriira aqoonta iyo maadada uu baranayo si uu u kasbado khibradii ku habboonayd suuqa shaqada inta uusan qalin jebin ka hor.

- Abuuridda guddi wada-tashi ah oo ka kooban jaamacadaha iyo shirkadaha (university-industry advisory boards) oo si joogta ah uga talo bixiya xirfadaha iyo aqoonta ku habboon suuqa shaqada oo suurtagalinaya in la helo jiil cusub oo leh aqoontii iyo kartidii (Knowledge, Skills and Competencies) looga baahnaa suuqa shaqada.

- Abuuridda manhajyo ay diyaarintooda qayb ka yihiin ganacsatada iyo hay'adaha dowladda kala duwan oo kor loogu qaadayo tayada aqooneed, hab-fakar, hoggaamin iyo hal-abuur ee ardada inta aysan dhammayn waxbarashada sare ka hor.

Wax ka qabadka iyo iska-kaashiga saddexda dhinac ee kor ku xusan, waxay suurtagelinaysaa isla markaasna hubinaysaa in ardaygu uu haysto xirfado la taaban karo iyo fursado shaqo oo u dhigma uuna yeesho kartidii hoggaamineed ee uu ku yeelan lahaa hortabintii iyo hankii horumarineed ee loo baahnaa. Waxa kale oo ay kor ugu qaadaysaa tayada iyo kartida jamaacadaha iyo guud ahaan waxbarashada sare.

## SHEEKOOYINKA DAHSOON: JIIL SUGAYA KOBOC

Ka warran Aamina oo ah gabar ku dhammaysatay maamulka dadweynaha (Public Administration) magaalada Garoowe. Inkastoo ay ahayd ardayad wax u baratay si heer sare ah, leh aqoon iyo karti qofeed, haddana muddo laba sano ah la il darayd shaqo la'aan. Sababta ugu wayn ee loo aanayn karo shaqo la'aanteeda waa in shahaadadeedu aanay aqbalayn hay'adaha gudaha iyo kuwa caalamiga ah ee deegaanka ka shaqeeya kalsooni darro lagu qabo jaamacadaha iyo waxbarashada sare ee dalka darteed!

Ka warran Cabdiraxmaan, wiil ka qalin jabiyay machad IT ah oo ku yaal Galkacyo oo shahaadadiisa uusan ku heli karin shaqo dowladeed ama hay'ad samafal, kuna furan karin ganacsi ama aqoon sida loo sameeyo hal-abuur.

Sheekooyinkani waa kuwo ay ka buuxdo dalka oo dhan, yar iyo waayeelka isla dhexmaraan. Haddii aysan wax iska beddelin, niyad-jabka

jiilkan waxaa laga yaabaa inuu isu rogo caqabad kale oo xasiloonida dalka ku timaada. Shaqo la'aanta baahsan, tayo xumida hay'adaha waxbarashada sare iyo qorsho xumada dowladeed waxay qayb wayn ka yihiin ama loo aanayn karaa tahriibka iyo dayaca baahsan ee haysta dhallin yarada Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaan.

# GUNAANAD: IFTIIMINTA RAJO-WANAAGGA IYO FURSADAHA

Waxbarashada sare ee Soomaaliya guud ahaan, gaar ahaan Dowladda Puntland, waxay taagan tahay isgoys taariikhi ah. Is-goyskaas, waddo ka mid ah waxay inoo horseedi kartaa jaahwareer hor leh, kalsooni-darro sii baahda, fursad lumis iyo wadciga hadda jira oo ka sii dara. Waddo kale waxay ina ku hayaamin kartaa isbeddel la taaban karo iyo in la xaqiijiyo aragti ay ku dheehan tahay geesinimo (Bold vison): in jaamacadaha iyo waxbarashada sare noqdaan dhabbaha runta ah ee lagu xaqiijin karo hoggaanka suuban, garashada fog, iyo kartida ku dhisan qiyamka iyo daacadnimada.

Arrintani maaha mid akadeemiya keliya, waa arrin taabanaysa amniga qaranka (National security), dhaqaalaha (Economic), iyo anshaxeed iyo qiyamka (Morale & Values).

Haddii aan dhab ahaantii rabno dhakhaatiir aan musuq lahayn, macallimiin dhiirrigeliya ardayda, injineerro dhisa buundooyin sugan, iyo wasiirro hufan oo leh aragti iyo barnaamijyo siyaasadeed oo wax dhisa, waa in aan toosinno jidka iyo tayada jaamacadaha iyo waxbarashada sare.

Mustaqbalka dhow, dalka iyo dadkaba waxaa hogaamin doona ardayda maanta qalin jabisay. Su'aashu waxay tahay: Maxaan u diyaarinaynaa inay noqdaan?

# TALO SOOJEEDIN:

1. Waa in aan xoojinaa awoodda iyo miisaaniyadda Guddiyada Tacliinta Sare si ay u hirgeliyaan tayaynta iyo hufnaanta jaamacadaha.

2. Waa in loo qoondeeyo ugu yaraan 15% miisaaniyadda waxbarashada dib-u-habeynta waxbarashada sare. 20 sano ee u dambaysay waxaa xoogga la saarayay helidda iyo wax ka qabadka waxbarashada hoose (Primary and Secondary Education). Waxaa la garay xilligii loo soo jeensan lahaa waxbarashada sare iyo hoggaamiyayaasha berrito.

3. Waa in la aasaaso akadeemiyado qaran oo lagu tababaro hoggaamiyeyaal jiilka cusub.

4. Waa in lala xiriiro isu-tagyada aqoonyahannada (Professional Bodies) si loo dhiso tayada macallimiinta iyo manhajyada waxbarashada sare.

5. Waa in mudnaanta la siiyo tayada, intii xoogga la saari lahaa tirada (Quality over quantity). Waxaa inagu filan dhowr jaamacadood oo tayo leh halkii aan ka samayn lahayn boqollaal aan la hubin kartida iyo aqoonta ardada ay soo saarayaan.

Gebo-gabadii, yaynaan lumin kartida, daaqada/tamarta iyo hammiga dhallinyarada iyo jiilka soo koraya. Aynu u abuurno waxbarasho sare iyo jaamacado aan ku ekaan in ay wax u dhigaan keliya ee kor u qaada aragtidooda, kartidooda, karaankooda iyo xirfaddooda hoggamineed si ay inoogu hoggaamiyaan mustaqbal aynu ku naaloono kuna faanno.

**W/Q:** Maxamuud C/Raxmaan Maxamuud, PhD

Email: m.a.mohamoud@gmail.com

# PUNTLAND: XAGJIRNIMADA SIYAASADEED AYAA UGA HALIS BADAN XAGJIRNIMADA HUBAYSAN

Xigashada Sawirka: Horseed Media



***"Jabinta garabka qalabka sida ee xagjirnimada hubaysan ma damaanad qaadi karto amni bulsho oo waara, inta ay jirto xagjirnimo siyaasadeed oo horseedaysa nuglaansho bulsho"***

Sida uu qabo Gilles Kepel oo ah qoraaga buugga, The Holy War, fikradda xagjirnimadu, hadday tahay mid hubaysan oo dagaalamaysa ama mid dowladaysan (state extremisms), marnaba ma suusho inta ay jiraan cid mabda' ahaan la dhacsan. Haddabada, in dowlad goboleedka Puntland ee Soomaaliya ay cudud ahaan wiiqdo xagjirnimada hubaysan ma waxay ka dhigan tahay in xididdada loo siibay fikraddii xagjirnimada?

Inta aynan su'aashaas jawaab u helin, waxaa isweydiin mudan, Puntland maxay u taqaan fal xagjirnimo. Xeerka Argagixisada Puntland waxa uu Argagixiso ku qeexayaa "falka kasta oo lagu doonayo ujeeddo cabsi ama khalkhal galin bulsho ama ku qasbid dowlad, hay'ad caalami ah ama cid gaar ah sameeynta ama ka baaqsashada fal, iyadoo la adeegsanaayo handadaad, dil, afduub ama ficil waliba oo khatar ku ah badqabka qofka, dowladda ama ha'yadda caalamiga ah'. Marka la eego qeexitaankaas, aragtida xagjirnimadu maaha mid ku kooban dhaqdhaqaaq hubaysan oo kaliya balse waa fikir waliba oo cabburin, cabsi gelin ama burburin naf iyo maal ay ujeeddadiisu tahay.

Qoraalkaan kooban waxa aan ku guudmari doonnaa afar (4) dhinac oo laga eegi karo si loo qiyaaso waaritaanka ama suulidda fikradda xagjirnimada.

## 1. SEESKA MABDA' XAGJIRNIMDA

Fikrad waliba, ha ahaato mid madani ah oo aragti iyo cilmi ku dhisan ama mid hubaysan oo qori caaraddii adeegsanaysa, waxa ay leedahay bud-dhig ay ka shidaal qaadanayso. Soomaaliya guud ahaan, gaar ahaan Puntland, waxa ay la ildaran tahay xagjirnimada ku dhisan marin habaabinta fahamka suubban ee diinta, siyaasadda iyo nabaad-guurinta dhaqanka. Fikradda xagjirnimo ee ku dhisan siyaasadda gurracan ama diinta la marin habaabiyey cudud ahaan in la wiiqo kuma suusho. Waa fikrad ay suurtagal tahay in lagu qanciyo dad badan iyadoo laga faa'iidaysanaayo hurgumooyinka ka dhex jira bulshada la rabo in lagu dhex faafiyo. Haddaba, inta ay jirto caddalad darro siyaasadeed, mid dhaqan-dhaqaale iyo hurgumo bulsho, kuma filna in la wiiqo garabka hubaysan si loo ciribtiro fikradda xagjirnimada.

## 2. BAAXADDA UJEEDDADA KOOXDA XAGJIRKA

Fikirka xagjinimo, inkastoo garabka qalabka sida ay ugu caansan yihiin, hadana waa ka guda ballaaran yihiin ujeeddo ahaan. Fikir waliba oo lagu curyaaminaayo isbaddal bulsho iyadoo la adeegsanaayo cabsi gelin ama cabburin waa fal xagjirnimo. Nooca xagjirnimo ee ay tahay in Puntland la dagaasho maaha kaliya mid hubaysan oo raba in uu dowladnimada meesha ka saaro, balse sidoo kale waa dhaqan siyaasadeed oo bulshada damiir ahaan wiiqaya. Waa fikir aysan ku filnayn in ciidan ahaan la jabiyo si deegaanka looga cirib tiro. Xaaladda dhaqan-dhaqaale, midda siyaasadeed iyo tan bulsho ee Puntland waa mid aan dagaal toos ah kula jirin fikradda xagjirnimada oo ah asalka khatartu ka imaanayso. Garabka hubaysan ee u dagaalamaya xagjirnimada, waxaa ka khatar badan garabka siyaasadeed ee horseedaya duruufaha dhiirigalinaaya argagixisada hubaysan.

## 3. XAALADDA DHAQAALE:

Saamaynta xaaladda dhaqaale ee fikradda xagjirnimadu waxa ay noqon kartaa laba dhinac oo saamigal aan qumanayn isku leh.

**A. Dhinaca koowaad:** heerka saboolnimo ee shacabka, oo sababi kara hurgumooyin iyo caddaalad darro bulshada dhexdeeda ku faafta, ayaa horseedi kara nacayb, kala tag bulsho iyo cuqdad laga qaado wax waliba oo dadku wada lahaa oo ay ugu horrayso dowladnimadu. Puntland waxaa heerkii ugu sarreeyey maraya cabburinta dhaqaale ee bulshada taas oo keeni karta in dad badan, iyagoo ka falcelinaaya hagrashada dhaqaale, ay cadgoosasho darteed u qaataan fikrad xagjirnimo oo hubaysan.

**B. Dhinaca labaad:** xagjinimada hubaysan oo noqon karta wadiiqo lagu abuuri karo hodannimo dhaqaale oo degdeg ah. Haddii siyaasaddu, halkii ay ahaan lahayd meel dadka loogu shaqeeyo, ay noqoto shirkad dhaqaale degdeg ah laga tabco, dhanka kale, dad badan oo waayey fursaddaas siyaasadeed waxay ku qanci karaan in xagjirnimada hubaysan ay tahay waddo hodannimo degdeg ah suurtagalin karta. Inkasta oo aan Daacish xog badan laga hayn, haddana Al-Shabaab ayaa ah tusaale laga arki karo dhinaca labaad ee fikraddaan. Sida ku xusan buugga "Al-Shabab Mafia Inc." Al-

Shabaab waxa ay samaysay dhaqaale gaaraya $2.2B sanadkii 2022, halka 2023 dhakhligoodu noqday 20% dhaqaalaha guud ee dalka. Arrintaasi waxay muujinaysa in kooxaha hubaysan aysan furin dagaal oo kaliya ahayn, balse sidoo ay leeyihiin garab dhaqaale uruurin oo bushada ku dhex jira. Jabinta garabka qalabka sida ee xagjirnimada hubaysan ma damaanad qaadi karto amni bulsho oo waara, inta ay jirto xagjirnimo siyaasadeed oo horseedaysa nuglaansho bulsho.

## 4. NOOCA NIDAAMKA XUKUNKA TALINAYA

Nidaamka dowladnimo ee deegaanka la tacaalaya xagjinimada hubaysan ayaa la aaminsan yahay in uu saamayn toos ah ku leeyahay waaritaanka ama suulidda fikradda xagjirnimada. Puntland labo (2) aragti oo halis ah ayaa ku hardamaaya.

**I. Aragtida koowaad:** Danlay dowladnimada ka ganacsata. Kooxdaan dal iyo dad midna ma eegaan. Saaxiib gaar ah ma leh, cadaw gaar ah ma leh, balse waxa ay leeyihiin dan gaar ah. Ciddii ay u arkaan inay halis ku tahay qorshaha hanti abuuris waxaa lagu shaabadeeyaa xagjirnimo iyo shisheeye kalkaal. Nidaamkaan waxa uu sare u qaadaa saboolnimada bulshada isla markaana waxa uu hoos u dhigaa fursada koboca dhaqaale si loo hanjabiyo cod waliba oo ku baaqi lahaa isbeddel.

**II. Aragtida labaad:** Askar in xukunka xoog lagu hanto aaminsan. Kooxdaan nabad xal kuma raadiyaan oo dabciga askariga ayaa amar qaadasho ku salaysan. Qolyahaas waxay aaminsan yihiin in ay dadka oo dhan ay ka mudan yihiin maadaama ay cudud ciidan haystaan. Gondohooda in ku filan oo gubi karta ayaa taal, dab baxaya in loo dhoweeyo uun baa ku filan.

Labadaas aragtiyood waxay u hiilinayaan waaritaanka fikirka xagjinimada hubaysan waana sababta keentay in wax ka badan 1000 dagaalyahan oo ajaanib ah Caal-Miskaad ay galaan iyadoon laga war hayn. Puntland waxay u baahan tahay aragti saddexaad (3) oo madani ah, aan hubaysnayn, dowladnimadana aan macaash ka raadinayn oo mar labaad aaminaadda dowladnimada ee shacabka soo noolaysa.

## XALKU MUXUU YAHAY?

Fikradda xagjirnimadu ma jiri karto haddii aysan helin deegaan ay si fudud ugu dhex baahi karto. Nuglaanshaha xagjirnimada hubaysan oo ka imaanaysa hurgumooyinka caddaalad darrada xagjirnimada siyaasadeed, midda dhaqaale ama cabburin ayaa noqon karta sabab caaqibo daran oo u adeegta ujeeddada gurracan ee kooxaha xagjirka hubaysan. Haddabada, si arrimahaas iyo kuwa la mid ah looga hortago, shacbka iyo dowladda Puntland waxaa la gudboon:

1. Taabbagalinta siyaasad furfuran, loo siman yahay, cid gaar ah aan u adeegayn oo dhayda hurgumooyinka ka dhexjira bulshada.
2. Abuuridda jawi dhaqan dhaqaale oo garbo siman looga wada faa'iidi karo. Suurtagal ma ahan in bulshada qaar awoodda dowladnimada ku naaxaan, qaarna ku boglaalmaan oo lagu dulmiyo, isla markaana si isku mid ah loo wada ilaashado amniga iyo jiritaanka Puntland.
3. Amniga Puntland laguma sugi karo cudud ciidan iyo qori caaraddii. Sidaa darted, Puntland waxaa la gudboon xoojinta iyo tayaynta hay'adaha sirdoonka iyo booliiska si looga hortago iskuday waliba oo xagjirnimo hubaysan ah.
4. Ka hortaggidda qulqulka muhaajiriinta sharci darrada ah iyo la dagaalanka daabulka iyo ka ganacsiga dadka ayaa sidoo kale ay tahay in mudnaan gooni ah la siiyo si amniga deegaanka loo dhawro.
5. Hirgelinta nidaam tiiraanyo bixin bulsho oo daadagsan ayaa sidoo kale door weyn ka ciyaari kara isku soo dhaweynta dadka iyo laab xaarnida guud ee bulshada Puntland.
6. Mansabka siyaasadeed ee Puntland waa in uusan noqon jaranjaro lagu gaaro dano gaar ah ama jago siyaasadeed oo sare. Damaca ah in dhaqaalaha iyo saamaynta siyaasadeed ee Puntland loo adeegsado si loo gaaro dano aan ahayn kuwii loogu tala galay ayaa dhalin kara aaminaad la'aan iyo dayac ku yimaada badqabka guud ee Puntland.

**W/Q:** Cabdiweli Waaberi

# PUNTLAND: WAXGARAD WALAACSAN 27-SANO KADIB

## Ka Hor Nidaam Cusub, Mala Sixi Karaa Nidaamka Jira?

Xigashada Sawirka: Garowe Online



"

*Midnimada dalkaygiyo, waxaan doonayaa guul.*

"

***Haykal M. Cabdi, 2020***

# IFTIIMIN:

Qormadani waxay falanqeynaysaa:

- Dulmar guud: Puntland 27 sano ka dib.
- Maxaa sababay walaaca waxgaradka 27 sano ka dib?

1. Hoggaan Xumo iyo Talo Maroorsi:
2. Caddaalad-darro Bulsheed, Sedbursi Siyaasadeed, iyo Musuqmaasuq Baahsan:
3. Go'doonsanaan Siyaasadeed Mise u Gogol Xaaridda Goonni'goosad:

Waa qormo - aragti shaqsi ah - ka turjumaysa oo aan ku falanqeynayo; Puntland 27 Sano Ka dib. Waxaan isku dayayaa inaan si gaar ah u iftiimiyo isweydaarka iyo kala fogaanta doodda Koonfederaal-ka iyo xaqiiqada ka jirta Puntland-ta kala daadanaysa. Ujeeddadu waa in la abuuro dood furan oo bulsheed, si masiirka Puntland looga wada hadlo si dhab ah oo mas'uuliyad wadareed ay ku jirto.

# ARAR:

Maamul-goboleedka Puntland waxa uu si rasmi ah u dhismay sanadkii 1998kii, ka dib shirar kala duwan oo lagu qabtay deegaannada Puntland, kuwaas oo ujeedkoodu ahaa in helo xal siyaasadeed oo degdeg ah oo lagu badbaadin karo deegaannada Waqooyi Bari ee Soomaaliya, kuwaas oo la wadaagasy gobollada dalka intiisa kale dagaalladii sokeeye iyo xaaladdii fawdo ee ka dhalatay burburkii Dowladdii Dhexe ee Soomaaliya1991kii.

Aas-aaska Puntland-na waxaa gun-dhig u ahaa laba ujeeddo :

1. In lagu kala nabad galo, oo dagaallada sokeeye aysan soo laaban.
2. In Puntland ay u noqoto udub-dhexaad raadinta iyo u qareemidda dawlad Soomaaliyeed oo dib loo yagleeyo.

Labadaas qodob waxaa xoojinaya ararta Axdiga lagu aas-aasay Puntland oo lagu caddeeyay in ujeedku yahay in carruurteenna aan dhaxalsiinno nolol nabad, caddaalad, baraare, iyo sugnaansho leh. Sidoo kale Axdiga qodobka 1aad, lambarkiisa 4aad oo qeexaya; In Puntland ay tahay qayb ka mid ah Soomaaliya, dadaalna ay ugu jirto soo-celinta midnimada ummadda Soomaaliyeed iyo curinta Dawlad Soomaaliyeed oo ku dhisan habka Federaaliga ah oo abbaaro gudboon la wada leeyahay.

Muddo 27 sano ka badan kadib, Puntland maanta waxay wajahaysaa xaalad siyaasadeed oo sii murgeysa, taas oo u muuqata mid guul-darro ku ah himiladii loo aas-aasay. Waxaa isa soo taraya dareenka kala fogaanshaha bulshooyinka deegaanka, cabashooyinka ku aaddan sedbursi siyaasadeed, dhaqaale, iyo ku takri-falka awoodda dowladeed oo u muuqda mid ku kooban koox gaar ah. Waxaa sidoo kale isa soo taraya codadka bulshada ee ku baaqaya dib-u-habayn, iyo kuwo bilaabay inay raadiyaan madax-bannaani.

27 sano kadib, dhawaqa iyo doodda taal gobollada Sool iyo Sanaag ee ku qotoma tabashooyinka soo jiitamayay, baaqyada kasoo baxaya gobolka Mudug, talada urursan iyo macangagnimada hoggaanka Puntland; waa arrimaha ay waxgaradka Puntland 27 sano ka dib welwelka ka qabaan, oo haddaan si dhab ah loo wajihin oo aan la tixgelin u muuqanaysa in meel fog laga dooni doono wadajirkii iyo walaalnimadii bulshada Alle ku wada abuuray deegaannadaas.

# DULMAR GUUD: PUNTLAND 27 SANO KA DIB:

Puntland waxaa ladhisay sanadkii 1998kii, kadib markii muddo kabadan sadex bilood uu wadatashi iyo shirar uga socday magaalada Garoowe waxgarad, Isimo, cuqaal, aqoonyahanno iyo siyaasiyiin. Siyaasiyiinta iyo dadka reer Puntland waxay aaminsanyihiin midnimada Soomaaliya, Puntland inay tahay qayb kamid ah Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya. Fikrad ahaan, Puntland waxay ahayd in ay noqoto dowlad goboleed Soomaaliyeed, oo sal u ah dib-u-dhiska guud ee dalka. Waxay ku dhisneyd mabda'a Federaalnimo, iyada oo aan ka

madaxbannaaneyn Soomaaliya inteeda kale, balse leh awood maamul oo hoos timaadda nidaamka Federaalka.

Puntland waxay soo martay saddex marxaladood oo siyaasi ah; Marxaladdii yagleelka waa labadii muddo xileed ee ugu horreeyay, inta bandanna, dawladda Puntland waxay sanadihii ugu horreeyay ee jiritaankeeda mudnaanta kowaad siinaysay, xoogeedana saaraysay, wax ka qabashada arrimaha nabad-galyada, waxay si deg deg ah ugu hawl gashay in lasoo nooleeyo awooddoodiina la soo celiyo hay'adaha fulinta sharciga ee Ciidanka Booliiska, Maxkamadaha iyo Xabsiyada. Dawladdu waxay u hawl gashay in la helo jawi nabadeed oo suurta galiya in sharciga iyo kala danbaynta gacanta sare ay yeeshaan iyo in la abuuro qaab kalsooni loogu qabi karo hay'adaha ammaanka ee dawliga ah. Marxaladdii dhexe, waa labadii muddo xileed ee dhexe, waxay ku suntanayd marxaladdaasi go'doonsanaan, iyo xir-xirnaansho siyaasadeed. Hoggaankii kala dambeeyay ee muddadaas waxaa jira dad qaba in ay ku dadaaleen in ay dhisaan hay'ado maamul iyo haykalka guud ee dawladda, balse marna ma jirin dedaal muuqda oo ku aaddan xoojinta wax wada lahaanshaha iyo wadajirkii bulshada reer Puntland. Puntland-na waxay ka leexatay aragtidii ballaarnayd ee isu haysay dadka reer Puntland.

Tani waxay keentay in qaar kamid ah gobolladii Puntland ay gacanteeda ka baxeen, xaaladdaasina waxay horseeday kala-fogaansho siyaasadeed iyo wiiqidda kalsoonidii ay ku qabeen Puntland dadkii wada dhistay qaarkood. Dhinaca kale isla marxaladadaas waxaa lagu dhawaaqay Maamulkii Raascaseyr/ Raascaseyr State (2011) taas oo ahayd natiijooyinka degdegga ahaa ee ka dhashay tabashooyinkii soo socday, iyada oo ay salka ku haysay in maamulka Puntland ay dayaceen deegaankaasi. Faarax Maxamuud Yuusuf (Dooxa Joog) oo loo doortay Madaxweynaha Maamulkaas ayaa sheegay inaysan ka tirsaneyn maamulka Puntland, isagoo ku eedeeyay inay canshuurta ka qaataan deegaanadaasi, haddana ay dayaceen.

Marxaladda hadda lagu jiro, waxay bilbaatay 2019kii, waxayna la kowsatay Puntland taladeedii oo qofaf ku urusan, macangagnimo iyo aragtiyo u janjeera go'doonsanaan & goonnigoosadnimo.

Marxaladdan, Puntland waxay kulansatay maamul xumo, dhaqaale burbur, shilin Soomaaligii oo ka suula deegannada Puntland guud ahaan, siyaasadeediina waxa ay u gacan gashay koox kooban, oo ujeedkeedu yahay dano gaar ah, hanti iyo awood urursi. Tanina waxay sii xoojisay fikraddii ahayd in Puntland aysan ahayn maamul la wada leeyahay. Saddexdan marxaladood waxay muujinayaan in Puntland maalinba maalinta ka dambaysa ay ka leexaneysay dhabbadii iyo himiladii loo yagleelay. Haddii aan dib loo sixin jihadaas oo aan la helin wadahadal dhab ah, Puntland waxay halis ugu jirtaa kala tafaraaruq iyo hoos u dhac kalsoonidii lagu qabay wada-lahaansheheeda.

## MAXAA SABABAY WALAACA WAXGARADKA 27 SANO KA DIB?!

### Hoggaan Xumo iyo Talo Maroorsi:

*"Haddii uu Ari-jirihii lumo, ariguna waa baylah."*

***- Xikmad***

Marka dawlad, shirkad ama urur uu la tacaalayo dhibaatooyin joogto ah, musuqmaasuq, jahawareer ama fowdo, Maxwell wuxuu leeyahay badanaa dhibaatadu ma ahan dadka ama kheyraadka, se waa hoggaan xumo. Waana sababta mar kasta oo xaalad adag timaaddo ay dadku si dabiici ah isha ugu hayaan isbeddel hoggaaneed.

Puntland oo kaalin hoggaamineed ku lahayd dawlad dhiska Soomaaliya muddo badan, maanta 27 sano ka dib waxay bannaanka ka taagan tahay dawlad-dhisidda Soomaaliya oo ay maal iyo waqti Punland u hurtay. Hoggaamiyayaashii u kala dambeeyay marnaba ma caddayn sababta Puntland u heli weysay deeqihii kala duwanaa ay xaqa u lahayd, ma dan gaar ah mise dan guud ayay dhibbani u yihiin bulshadaasi? Ka maqnaanshaha Golaha Wadatashiga Qaranka wuxuu u ekeysiiyay Puntland maamul laga maarmi karo. Labaatan sano ka hor, Puntland waxay ahayd horseedka dawlad dhisidda Soomaaliya iyo ilaaliyaha midnimada Soomaaliya. Hoggaan xumo iyo talo qof ku urursani waxay Puntland ka dhigtay Marti-siyaasadeed, waxaana dhigay meesha ay maanta taallo.

Maanta horumarka Puntland ka jira waa mid lagu tilmaami karo "HORUMAR AAN HOGGAAN LAHAYN." Waxay ka dhigan tahay in nabadgelyada nisbiga ah, koboca ganacsiga, iyo wadajirka bulsho

ay badanaa horseedday bulshadu. Horumarkaasi ma ahan mid uu qorsheeyay ama hoggaamiyay hoggaan siyaasadeed oo hiigsi leh, balse waa mid ka dhashay hal-abuurka iyo adkaysiga dadka reer Puntland. Taa beddelkeeda, hoggaannadii siyaasadeed ee muddada dheer meesha joogay waxay ku guuldarreysteen in ay si istiraatiiji ah u maamulaan, una hormariyaan fursadaha jira, taasoo ka dhigtay in guulaha muuqda 27 sano ka dib ay yihiin kuwo bulshadu si dabiici ah u gaartay, halka kaalintii hoggaamineed ay maqnayd.

## CADDAALAD-DARRO BULSHEED, SEDBURSI SIYAASADEED, IYO MUSUQMAASUQ BAAHSAN:

*"Rag caddaalad waayaa; sidii cawsha kala yaac."*

*- Gabay*

Mid ka mid ah waxyaabaha salka u ah dhibaatooyinka Puntland maanta wajahaysa waa dareen guud oo ku saabsan caddaalad-darro bulsheed, sedbursi siyaasadeed iyo musuqmaasuq baahsan. Dad badan oo kamid ah bulshada Puntland ayaa aaminsan in awoodda dawladeed, fursadaha siyaasadeed iyo kheyraadkii bulshadu wadaagtay ay ku urureen gacanta koox gaar ah, taasoo keentay in bulshada kale dareemaan in maqaarsaar ku yihiin maamulkii ay wax ka dhisteen.

Qaabka loo qeybsado xilalka dowladda, mashaariicda horumarinta, iyo fursadaha shaqo ee dowladda ayaa marar badan noqday mid ku suntan eex, sedbursi iyo musqmaasuq. Eexdu waxaa ay ku timaadaa noocyo kala duwan oo ay ka mid yihiin: Eex ku salaysan qabiil, mid ku salaysan saaxiibtinimo. Masuulka adeega u qabanaya bulshada ayaa waxaa uu ugu adeega dadka markaasi uu adeega u qabanayo si ku salaysan qof jeclaysi iyo eex, waxayna taasi sii curyaamisay adeegyadii koobnaa ee shacabka gaarayay. Arrimahaas ayaa sababay kalsooni darro baahsan oo u dhexeysa maanta bulshadii wax wada dhistay 27 sano ka hor.

Caddaalad la'aantu waa caqabad burbur kasta budhig u ah. Haddii aan shacabka la dareensiin sinnaan ku aaddan kheyraadka, matalaadda siyaasadeed, fursadaha shaqo iyo horumar, kala fogaanshuhu wuxuu noqonayaa abadi, ma noqonayo xaalad iyo marxalad laga gudbikaro. Sidaas darteed, Puntland waxa ay u baahan tahay hirgelinta caddaalad bulsheed, nidaam metelaadeed oo sinnaan iyo isku dheellitirnaan bulsho ku dhisan.

Noocyada Musuqmaasuq ee Puntland ka jira:

Noocyada ugu waawayn ee musuqmaasuq ka dhex dhaca hay'adaha dowladda Puntland waa sidatan hoos ku xusan:

- Musuqmaasuqa Qandaraasyada Dowladdu bixiso (Corruption in public procurement)
- Musuqmaasuqa Deeqaha Caalamiga ah (Misuse of Development Aid)
- Musuqmaasuqa Shaqaalaysinta shaqaalaha Dawladda (Public sector's recruitment/ employment corruption)
- Musuqmaasuqa canshuuraha Dekedda, Garoomada, xuduudaha Puntland (corruption in Customs authority)
- Musuqmaasuqa Dawladaha Hoose (corruption in local municipalities)
- Musuqmaasuqa Shaqaalaha Dawlada (Caaglayaal). (Government ghost workers):

**FG:** Caaglayaal: Macnaheedu waa dad aanan jirin oo ku jira diiwanka shaqaalaha dawladda, bilkastana dadkaasi magacyadooda lagu lacag qaato.

## MUSUQMAASUQA LAAMAHA CADAALADDA (CORRUPTION IN THE JUSTICE SYSTEM)

Marna Puntland kama dhaqan gelin nidaam wanaagsan oo lagu maamulo hantida bulshada. Bilawgii horeba Puntland dhaqaalaheeda waxaa si gaar ah u maamulan jiray madaxweynaha iyo inta la hal maasha.  Marna ma jirin Xisaabiye Guud iyo Hanti-dhawr Guud oo shaqadooda u madax banan baarlamaankuna la xisaabtami karo.  Waxay ahaayeen kuwa uu madaxweynahu isagu magacawdo isagana hoos taga.  Sidaas waxaa qaba Xildhibaan Hore ee Puntland (2019-2024) Maxamed Siibad.

Halka Agaasimihii Hay'ada Astaynta Maamul Wanaagga iyo La-dagalaanka Musuqmaasuqa Puntland Cabdiraxmaan Cali Guureeye, isagu uu qabo fikir kaas mid ka duwan: "Puntland waxaad mooddaa haddeer in ay si rasmi ah cagta u saartay Maamul Wanaaggii aan ku taamaynay... Waxaad mooddaa in mirihii Maamul Wanaaggu in iyaga oo curdin ah ay muuqdaan maanta." Sidaas wuxuu ku yiri Waraysi Warbaahinta Daljir ay la yeelatay.

Hay'adda Astaynta Maamul Wanaagg Iyo La-dagaallanka Musuqmaasuqa Puntland. Haa, waa hay'ad jirta, waxaa laga yaabaa in maanta maqalka magaceedu uu kuu yahay. Inkasta oo hay'addan loo sameeyay ujeeddo qurxoon (la-dagaallanka musuqmaasuqa), haddana waxaa muuqata in aanay jirin wax natiijooyin la taaban karo ah oo ku aaddan shaqadeeda ilaa hadda. Hay'addaan ayaa lagu tilmaami karaa "Dab-damis aan biyo wadan", jiritaankeeduna waa mid aan magac dhaafsiisnayn.

## GO'DOONSANAAN SIYAASADEED MISE U GOGOL XAARIDDA GOONNI'GOOSAD:

*"Keligii nin gaashaantay wuu, gola ka fuulaaye."*

*– Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi) AHUN, 1990.*

Nidaamka Koonfederaal-ku waa hannaan siyaasadeed oo dawlado ama gobollo madax-bannaan ay ku midoobaan si ay u yeeshaan iskaashi xadidan, taas oo oggolaanaysa in dawladuhu ay go'aammo waaweyn oo muhiim ah u madax-bannaan yihiin. Waa nidaam ka duwan midka Federaalka ah ee awoodda ay la qabsanayaan dawladaha xubnaha ka ah dawladda dhexe, iyada oo dawladda dhexe weli leedahay xayndaab sharciyeed iyo mid awoodeed oo aysan dawladaha xubnaha ka ahi ka tallaabi karin.

***"Koonfederaalku waa isbahaysi u dhexeeya dalal dhowr ah, kaas oo lagu dhiso heshiis ujeeddadiisu tahay in si wadajir ah loo gaaro yoolal laga midaysan yahay, sida difaaca, iskaashiga arrimaha dhaqaalaha iyo dhaqanka, iyo in la dhiso hay'ad wadaag ah oo iskudubbaridda gaarista yoolashaas. Si kastaba ha ahaatee, dal kasta oo ka tirsan isbahaysigaas [Koonfederaalka] wuxuu yeeshaa sharciyaddiisa gaar ah, iyo u madax-bannaanida arrimihiisa gudaha iyo dibadda, mid walbaana wuxuu leeyahay madax u gaar ah."***

Ujeeddooyinkii ugu horreeyay ee loo dhisi jiray – sooyaalka kolka la raaco - nidaamka Koonfederaalku waxay ahayd in la helo awood dhaqaale iyo mid ciidan oo u sahlaysa dawladaha qaarkood inay la-dagaallamaan quwado siyaasadeed oo kale, oo ay u arkayeen awood ka dhan ah oo duullaan ku ah, taas oo Khasab uga dhigaysay in ay iskaashadaan.

Dhanka kale, taariikhda dhow ee dawladnimada casriga ah waxaa aad u xoogaystay nidaamka Federaalka, kaas oo ku fadhiyay dhismaha dawlad dhexe oo leh hay'ado door weyn ka qaata horumarinta, midnimada, koboca dhaqaalaha, iyo xasilloonida siyaasadeed ee dalka guud ahaan, iyada oo la ilaalinayo lana tixgelinayo awoodaha gaarka ah ee dawladaha xubnaha ka ah dawladdaas.

Federaalaynta Soomaaliya kolka la dul istaago, waxay soo martay saddex marxladood; Marxaladdii Koowaad ee nidaamka Federaalka ah ee Soomaaliya waxay ahayd 1943kii, isaga oo uu soo bandhigay Xisbigii Digil iyo Mirifle, kaas oo maslaxaddiisa ka dhex arkayay xilligaas. Halka Xisbigii Midowga Dhallinyarada Soomaaliyeed uu markasta ku doodayay dawlad dhexe gaar ahaan xilligii 1950-1960kii, ugu danbaynna xisbiyadii kale dhammaantood ay nidaamka dhexe u codeeyeen. Marxladda Labaad waxey ahayd 1993kii, xilligaas oo lasoo bandhigay Dukumiintigii aysoo saareen khubaradii ajaanibta ahayd, kaas oo ay ugu danbayn kusoo bandhigeen shirkii Itoobiya lagu qabtay 1996kii, islamarkaasna nidaamka 4.5-ka lagu qaatay. Waxaana loo arkay in Federaalku yahay nidaamka kaliya ee hay'ado siyaasadeed oo awood leh lagu dhisikaro. Ugu danbaynna dawladdii ugu horreysay ee Federaal ah waxay Soomaaliya yeelatay Oktoobar 2004tii, taas oo uu Col. Cabdullaahi Yuusuf Axmed AHUN madaxweyne ka nqoday. Marxaladdii Saddexaadna waxey ahayd kadib markii Federaalku noqday wax waaqici ah, kaas oo noqday qodob ka mid ah qodobbada Dastuurka Qabyo-qoraalka ah ee Dawladda Federaalka Soomaaliya 2012kii.

Nidaamka Federaalka Soomaaliya maanta wuu dhawr iyo labaatan sano jirsaday, waxaana barbar socday muddadaas dooddii Federaal-doonka cuskanayay horumarka maxalliga ah, kala duwanaanshaha qabiillada Soomaalida, waaqaca iyo maqnaanshaha Somaliland, iyo dooddii Federaal-diidka u hanqal taagayay dawlad dhexe oo xooggan ee walaaca ka qabay loollanka dhuleed iyo midka xuduudeed, koritaanka faragelinta shisheeye, haybta dadka Soomaaliyeed jaahwareer dhaqaale oo ka imaanaya isu dheellitirnaan la'aanta waxsoosaarka dalka iyo maamulkiisa. Waxaase maanta kusoo kordhay doodahaas hindisayaal siyaasadeed, nidaamkii jirayna waxaa laga muujinayaa quus iyo dhaqangelid la'aan. Qaar ka mid ah siyaasiyiinta iyo aqoonyahanka reer Puntland ayaa keenay dood cusub, walow Puntland loo tiirinayay hindisaha nidaamka Federaalka. Halka ay jiraan waxgarad iyo siyaasiyiin wali qaba in uu yahay nidaamka Federaalku xalka haddii loo meel dayo.

# 1. LACAGTA CUSUB EE PUNTLAND

Sida ku cad - Dastuurka Ku-Meel Gaarka Ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya – Qodobkiisa 54aad,-qaybsiga siyaasadeed iyo dhaqaale waxaa ka wada xaajoon doona Xukuumadda Federaalka iyo Dawladaha ka mid noqonaya Dawladda Federaalka Soomaaliya marka laga reebo: A) Arrimaha Dibadda; B) Difaaca Qaranka; C)Jinsiyadda iyo Socdaalka iyo D) Siyaasadda Lacagta, oo ay awooddeeda iyo mas'uuliyaddeeda yeelaneyso Xukuumadda Federaalka.

Iyada oo sidaas ay dhayda uga cad yihiin qodobbadaas dastuuriga ahi Madaxweynaha Puntland ee hadda talada haya, Mudane Siciid Cabdullaahi Deni, ayaa (21 December 2024kii) shaaciyay in Puntland ay yeelan doonto lacag u gaar ah sanadka cusub ee 2025ka. Madaxweynaha Puntland ayaa sheegay in qorshahani uu yahay mid muhiim ah oo loogu talagalay in lagu xoojiyo dhaqaalaha Puntland, maaddaama sida uu sheegay aan rajo laga qabin in la helo lacag Shilin Soomaali ah oo mideysan.

"Waxaan rabaa inaan halkaan ka faro iyaga oo raacaya nidaamyada adduunka. Dalal badan ayaa jira oo Federaal ah oo lacag kala duwan leh. Macnaheedu maahan inaan Soomaalinnimadii ka baxnay, balse waxaan rabaa Puntladn lacag ay leedahay inaad daraasaddeedii bilowdaan oo aad raadisaan. Muddo ayaan sugaynay in Shilin Soomaali midaysan la sameeyo. Ma muuqdo, marka maanta go aankaas ayay dalwaddu waayadaan ka shaqaynaysay, daraasaddeeduna socotaa, waxaan rajaynaynaa muddo gaaban oo inta 2025ka lagu jiro in la helo lacag Puntland ay leedahay oo hadhow la jaan qaadi doonta nidaamka maaliyadeed ee Soomaaliya markii miyirka iyo maskaxdu soo noqoto oo dadka Soomaaliyeed oo is oggol oo nidaam waaxida yeeshaan."

Waxaa xusid mudan Degaannada Puntland in haatan laga isticmaalo lacagta dollarka iyo lacagaha danabaysan ee shirkadaha isgaarsiinta. Sanadkii 2021kii ayay ahayd markii Puntland uu ka istaagtay shilinka Soomaaliga.

Sababa ugu weyn ee uu istaagay shilin Soomaaliga ayaa ahayd markii madaxweyne Deni uu soo saaray amar lagu joojinayo in canshuurta Dekedda Boosaaso lagu qaado Shilin Soomaali. Go'aankaan ayaa sababay in ganacsataduna diideen Shilin Soomaaliga, kalsoonidii lagu qabayna ay lunto.

Waxgaradka Puntland iyo khuburada walaacsan ee ku takhasusay Bangiyada ayaa qaba in uusan xalku ahayn lacag cusub, balse ay tahay in Bangiga Dhexe ee Soomaaliya uu qaataa masuuliyaddiisa, maadaama bangigu uu xaq u leeyahay maaraynta siyaasadda lacageed ee dalka.

Hadalka Madaxweyne Siciid Cabdullaahi Deni ee ku saabsan samaynta lacag u gaar ah Puntland, inkasta oo uu u muuqday gole ka fuul, haddana wuxuu si dadban u tilmaamayaa jiho cusub oo Puntland u gogol xaareyso iyo madax-bannaani sharciyeed oo ka fog tiirarka Federaalka lagu heshiiyay. Tallaabadan, ayaa si toos ah uga hor imaanaysa qodobka Dastuurka Ku-Meel Gaarka Ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya ee siyaasadda lacageed u xilsaaraya dowladda dhexe.

## 2. HAY'ADDA AQOONSIGA DADWEYNAHA PUNTLAND

Dawladda Federaalka Soomaaliya, iyada oo ka duuleysa himilooyinka dastuuriga ah iyo qorshayaasha horumarinta dalka, ayay muddo ku hawlanayd dhismaha nidaamka Aqoonsiga Qaranka, kaas oo door weyn ka qaadanaya dib u dhiska dawladnimada iyo xaqiijinta amniga qaranka. Haddaba, Xukuumadda DFS ayaa horey u meelmarisay Siyaasadda Agoonsiga Qaranka, sidoo kale labadda Aqal ee Barlamaanka DFS ayaa iyana meelmariyey xeerka Aqoonsiga Qaranka Xeer lambar 9, Maarso 2023 iyo xeerka illaalinta Xogta Muwaadinka Xeer lambar 5, Maarso 2023, waxaana la aas-aasey Hay'adda Qaranka ee NIRA.

Dhinaca kale, Madaxweynaha Dowladda Puntland Mudane Siciid Cabdullaahi Deni, ayaa soo saaray Xeer Madaxweyne Lr. 04 ee 9-Ka April 2025 kuna saabsan Dhismaha Hay'adda Aqoonsiga Dadweynaha Puntland (PID).

Tallaabada uu qaadey Madaxweynaha Puntland ee ah sameynta Aqoonsi kale oo lagu cargaladeynayo Aqoonsiga Qaranka (Lr. 04, 09/04/2025), waa dhayalsi masuuliyadeed iyo mid sharciyadeed, waana mid si toos ah ugu xadgudbeya hannaanka dawladnimao ee dalka.

Wareegto ka soo baxday Xafiiska Madaxweynaha Puntland ayaa u qorayd sidan hoose:

Boosaaso: 09 April 2025: Madaxweynaha Dowladda Puntland Mudane Siciid Cabdullaahi Deni, ayaa soo saaray Xeer Madaxweyne Lr. 04 ee 9-Ka April 2025 kuna saabsan Dhismaha Hay'adda Aqoonsiga Dadweynaha Puntland (PID).

Madaxweynaha Dowladda Puntland.

Markuu arkay: Dastuurka Dowladda Puntland.

Markuu arkay: Baahida loo qabo Dhismaha Hay'adda Aqoonsiga Dadweynaha Puntland.

Markuu arkay: Talo soo jeedinta Wasaaradda Arrimaha Gudaha Dowladda Puntland.

Wuxuu xeeriyey: -

1. Waaxaa la dhisay Hay'adda Aqoonsiga Dadweynaha Puntland (PID).

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo, wuuna saxiixay.

-XAFIISKA WARFAAFINTA MADAXTOOYADA DOWLADDA PUNTLAND-

Tallaabadaan ku aaddan dhismaha Hay'adda Aqoonsiga Dadweynaha Puntland (PID), waxay ka tarjumaysaa hab ka leexsan hannaanka Federaalka, taas oo khatar ku ah wadajirka iyo nidaamka dowladnimo ee dalka. Ficilkani wuxuu u muuqan karaa u gogol xaarid goonni'goosad, taas oo kordhin karta kala-fogaanshaha siyaasadeed iyo jahawareer hor leh.

## 3. ARAGTIDA KOONFEDERAALKA: XALKA JUXA IYO XAALADDA PUNTLAND MA WADA SOCDAAN!

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dimuqraadiyeynta ee Dawladda Puntland ee Soomaaliya, Mudane Cabdi Faarax Juxa wuxuu qabaa in lagu guuldarraystay dhisiddii Jamhuuriyaddii 3-aad ee Federaalka ayna mudan tahay in nidaam cusub loo guuro. Aragtida Mr Juxa waxay u muuqataa mid laablakac ah, waxayna si mug leh u iftiiminaysaa laba qodob oo muhiim ah: 1. Indha la'aanta ku lammaan u doodista nidaamka Confederal-ka, iyada oo aragtidani xoojinayso in Puntland ay ka baxdo nidaamkii Federaalka ee dastuuriga ahaa, oo ay noqoto dawlad madax-bannaan, taasi waa mid waaqaca daba marsan, waxayna kusoo beegantay xilli Puntland-ta uu Wasiirka ka yahay Mr Juxa ay wajahayso kala fogaansho bulsheed, tabashooyin ragaadiyay iyo khilaafyo siyaasadeed oo kallifay in qaar ka mid ah dadkii wada dhistay Puntland ay u banbexeen dhismaha maamul ka madax bannaan, & 2. In dhibaatada uu tunka u saaray nidaamka siyaasadeed, balse dhibtu ay tahay habka loo dhaqangelinayo nidaamka. Halkaana, waxaa ka abuurmay su'aalo muhiim ah oo ay ka mid yihiin: Soomaaliya hadda ma ku habboon yahay nidaamka Koonfederaalku? Ma laga baaraan degay? Yuuse faa'iido u yahay nidaamkani? Ka hor nidaam cusub se, mala sixi karaa nidaamka jira?

Sidaas darteed, aragtida Wasiir Juxa saaxadda siyaasadeed ee Puntland waxay ka noqotay mid ay adagtahay in ay yeelato taageero sharci, mid bulsho ama siyaasadeed toona, iyada oo siyaasiyiinta, aqoonyahanka iyo waxgaradka Puntland ay kaga falceliyeen diidmo iyo dood maangal ah.

Soomaaliya maanta uma baahna in la kala gooyo, Confederal loo gacan-haatiyo, dowlad-goboleed walbaana gaar u baxdo, balse waxaa habboon in madaxda Soomaalidu ka shaqeeyaan sidii Soomaali laysugu soo dhawayn lahaa, cidda maqan loo raadin lahaa, waxa maamul ahaan iyo siyaasad ahaan ka khaldanna loo sixi lahaa; si loo taabagaliyo dowlad xooggan oo hay'adaheeda dastuuriga ahina u dhamaystiran yihiin, aragtida cusub (Confederal) ee Wasiir Juxa soo bandhigay maaha mid u adeegaysa wadajirka, midnimada iyo isku haynta bulshada Soomaaliyeed oo ay kalsooni darrada xooggani dhextaallo, una baahan in laysku soo dhaweeyo, khilaafaadka dhexyaallana xal loo raadiyo, dowlad xooggan oo ay heshiis ku yihiinna loo dhiso.

Dooddii Dr. Cali Xaaji Warsame ee May Fakaraan - 23 May 2025 iyo middii aan qabay #Puntland Boob Fair- 5 December 2024, waxay si mug leh u iftiiminayaan laba qodob oo muhiim ah: 1. Indha la'aanta ku lammaan u doodista nidaamka Confederal-ka, & 2. In dhibaatadu aysan ka imaan nidaamka laftiisa balse ay ka dhalanayso habka loo dhaqangelinayo.

Awoodda xamar laga soo qaado in Garowe lagu sii haysto micno badan ma lahan, waa in awoodda la daadajiyaa oo Dowladaha hoose xoogga la siiyaa. Dad baa hadda caayaya Federaalka, waxay leeyihiin Konfederaal ayaa la aadayaa. Waa qolo waalan! "Confederalku in dalka la kala gooyo weeye. Federaalism kuna ma shaqayn waayine hay'adihii ka shaqayn lahaa ayaa la la' yahay."

Sidoo kale, aqoonyahan Mahad Geelle, oo dhambaalka Wasiir Juxa ka falcelinaya (16 May , 2025) wuxuu leeyahay; Juxoow, dooddu ma jirto ee hanaga dilin garnaqsiga. Federaalku waa saddex nooc – iyo Raggii Cabdullaahi Yuusuf, hormuudka u ahaa waxay Soomaali u dooreen in "Cooperative Federalism" la qaato oo Doolshaha Xukunka' si hufan oo dhab ah loo qeybsado oo qolo kasta dhadhamiso macaankiisa!

Waxay Puntland soo martay safar siyaasadeed oo dheer tan iyo 1998kii, waxay Puntland u noqotay udub-dhexaad raadinta iyo u qareemidda dawlad Soomaaliyeed oo dib loo yagleeyo. Balse 27 sano ka dib waa Puntland oo hay'adaheedii dawladeed u qareemayaan goonni-goosad, waa Puntland oo ay dul hoganayaan weydiimmo tiro beel ah.

In kasta oo Mr Juxa uu qabo in dooddiisu meel mar tahay, se Waxgaradka Walaacsani ee reer Puntland waxay u arkeen mid sii kala fogeynaya bulshadii midaysnayd, waxay ku doodayaan Waxgaradka Walaacsani in dhibaatada Puntland haysataa uusan xal u ahayn magac cusub ama nidaam kale oo la yabyabay, balse ay u baahan tahay; in la dhiso kalsooni bulsheed, in la helo siyaasad loo dhan yahay, wadatashi iyo heshiis bulsho oo cusub, iyo dhanka kale in la xoojiyo hay'adaha dawladeed si loo ilaaliyo midnimada iyo wadajirka dadka iyo dalka.

# GUNAANAD:

**Ka Hor Nidaam Cusub, Mala Sixi Karaa Nidaamka Jira?**

Marka la eego 27-kii sano ee la soo dhaafay, Puntland waxay lasoo noolaatay hurgumooyin ay ka mid yihiin hoggaan xumo, caddaalad-darro bulsheed, musuqmaasuq baahsan, iyo go'doonsanaan siyaasadeed. Dhibaatooyinkan ayaa si cad u muujinaya baahida loo qabo dib-u-habeyn dhammaystiran oo ku aaddan nidaamka maamulka iyo midka siyaasadeed, si loo xaqiijiyo xasillooni, wadajir iyo horumar waara.

Sidoo kale, sixitaanka nidaamka siyaasadeed ee 27 sano jirsaday ma noqon karo hawl fudud oo u baahan in la beddelo hoggaanka oo keliya; waxay u baahan tahay isbeddel dhammaystiran oo ka yimaada dhammaan heerarka bulshada.

Ugu dambeyntii, su'aasha ah "Ka hor nidaam cusub, mala sixi karaa nidaamka ka jira?" waxay noqoneysaa mid ku xiran hadba go'aanka iyo dedaalka wadajirka ah ee bulshada iyo hoggaanka Puntland. Waa sida ay qabaan waxgaradka walaacsan "Maanta Puntland, tii lawada dhistay maaha e, nuqsaan baa gashay oo ku timid. Talada dhulka halla dhigo. Inta isku hartayna Shirweyne halloo qabto oo haka tashadeen aayahooda iyo mustaqbalkooda." Haddii la hirgeliyo isbeddel dhab ah oo ka tarjumaya rabitaanka bulshada, duruufaha deegaanka iyo himiladii loo aasaasay Puntland, waxay u muuqataa inay Puntland fursad u haysato wali in ay dib u dhisto kalsoonida, caddaaladda, iyo wadalahaanshihii muddada dheer laalnaa.

**W/Q:** Aadan Salaad Maxamuud (Badiic)













**Website**: https://maragnews.com/
**Email**: editor@maragnews.com

MAJALADDA
MARAG